

Tababbarka Hanuuninta Shaqaalaha Daryeelka Muddada-Dheer



Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida



Tusmo

Luuqadaha Lagu Heli Karo	1	Diiwaangelinta iyo Ka Soo Warbixinta	27
Qoraal ku socda Shaqaalaha oo ku saabsan Hanuuninta	2	Indha-indhee	27
Hordhaca Hanuuninta	4	Diiwaangelinta	28
Erey-bixin: Macaamiisha iyo Daryeelayaasha	4	Ka Soo Warbixinta	29
Dadka aad taageerto	5	Ka Soo Warbixinta Khasabka ah	30
Kooxda Daryeelka Macmiilka	5	Waa Kuma Cidda Qaangaarka ah ee Nugul?	30
Xuquuqda Macmiilka iyo Dadka Deggan	6	Qeexid	30
Doorashada iyo Xorriyadda	6	Warbixin Diyaarin	34
Ilaalinta Sirta	7	La-shaqeynta Kormeerahaaga	
Asturnaanta	8	iyo Ka Soo Warbixinta	35
Xuquuqda Degganaha	8	Wax Badan oo ay Tahay In Laga	
Doorka Aad Ku Leedahay Ilaalinta Xuquuqaha	9	Oggaado Ka-warbixinta	35
Difaacayaasha Xuquuqda Dadweynaha iyo Ururrada U-qareemeynta	10	Is-Daryeelka loogu talagalay Daryeelayaasha	37
Goobaha Daryeelka	11	Calaamadaha walbahaarka	37
Daryeelka Guriga Gudahiisa ah	11	Ku Dhaqanka Is-Daryeelka	37
Daryeelka Goobta Degaanka ah	11	Dhibaatooyinka Ka Jira Goobta Shaqada	38
Mas'uuliyadaha Shaqada Aasaasiga ah ee Shaqaalaha Daryeelka Muddada-Dheer	13	Shuruudahaaga Dheeraadka ah ee Tababbarka iyo Shahaaddo-qaadashada	39
Waxqabadka Shaqada	13	Soo-gudbinta iyo Codsiga	39
Fahamka Waajibaadkaaga Shaqo	14	Shuruudaha Tababbarka	39
Qorshayaasha Daryeelka	15	Caawimaad ma u Baahan Tahay?	40
Ka-hadalka Qorshaha Daryeelka ama Liiska Hawsha	15	Imtixaanka Kaaliya Daryeelka Guriga	40
Dhisidda Xiriirrada	17	Waxbarasho Sii-wadasho iyo	
Daryeelka uu Qofku Xuddunta u Yahay	17	Dib-u-cusboonaysiinta Shahaaddada	40
Su'aalo Weyddii	18	Geboggebo	41
Nidaam Joogto ah Samee	19	Lifaqa 1aad: Ereyada La Isku Gaabiyay ee Guud	42
Mar Kale Weyddii	19	Lifaqa 2aad: Liisto-hubineedda Hanuuninta Shaqaalaha Daryeelka Muddada-Dheer	44
War-isgaarsiinta	20	Mahadnaq	45
War-isgaarsiin Ixtiraamka Leh	20	Horumarinta Manhajka	45
War-isgaarsiinta Wanaagsan	21	Kuwa Wax-ku-biirrinaya	45
Ka-soo-bixidda Baahiyada		Macallimiinta Tijaabada ah	48
War-isgaarsiineed ee Macmiil Kasta	21	Tifaftiriddii iyo Nakhshadeynta Ugu Dambaysay	48
Aragtida Koowaad	22	Helidda Dokumentiga	48
Dhageysiga	23	Sawirrada waxaa iska leh	48
Jir-ka-hadalka	24	Nala Soo Xiriir	48
War-isgaarsiinta Xirfadeed	25		
War-isgaarsiinta Xaaladaha Degdegga ah	26		
La-hadalka Xubnaha Kooxda Daryeelka	26		

Luuqadaha Lagu Heli Karo

This document is available in multiple languages at: dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available.

ይህ የመማሪያ መጽሐፍ በተለያዩ ቋንቋዎች ይገኛል በ:- dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available ላይ።

[.dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available](https://dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available) هذا الدليل متاح بلغات متعددة عبر الرابط الإلكتروني:

សៀវភៅកម្ពុជា៖ គឺអាចរកបានជាមុនគាសា៖ dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available.

此课本提供多种语言: dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available.

本課本提供多種語言: dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available.

본 교과서는 dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available에서 여러 언어로 이용하실 수 있습니다.

Этот учебник доступен на многих других языках здесь: dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available.

Buuggan akhriska waxaa lagu heli karaa luuqado badan waxaanna laga heli karaa bartan: dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available.

Este libro de texto está disponible en varios idiomas en: dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available.

Ang batayang aklat na ito ay makukuha sa maraming wika sa: dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available.

Цей посібник доступний кількома мовами за адресою: dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available.

Sách giáo khoa này hiện có trong nhiều ngôn ngữ khác nhau tại: dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available.

Qoraal ku socda Shaqaalaha oo ku saabsan Hanuuninta

Shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ee aan weli noqon Kaaliyaaasha Daryeelka Guriga ee la aqoonsadey kaas oo aan laga dhaafin sida ku cad [WAC 388-71-0839](#) ama [RCW 18.88B.041](#) waa in uu dhammeystaa 2 saacadood oo hanuuninta shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ah iyo 3 saacadood oo tababbarka bedqabka ah ka hor inta aaney daryeelin macaamiisha ([WAC 388-112A](#) iyo [WAC 388-71](#)). Xarumaha degaanka ah, shakhsiyadka laga dhaafey sida ku cad [RCW 18.88B.041](#) iyo mutadawaciinta waa in ay dhammeystaan tababbarka hanuuninta xarunta ka hor inta aaney la-tacaamul joogto ah la yeellan macaamiisha ([WAC 388-112A-0200](#)).

Dokumentigan wuxuu soo bandhigayaa dhammaan mowduucyada hanuuninta shaqaalaha daryeelka muddada-dheer sida ay dhigayaan [WAC 388-112A-0210\(2\)](#) iyo [WAC 388-71-0846](#). Guryaha qoyska qaangaarka ah, xarumaha xannaaneynta waayelka iyo naafada, xarumaha adeegyada la wanaajiyey iyo hay'adaha daryeelka guriga waxaa lagu dhiirrigelinayaa in ay adeegsadaan macluumaadka dokumentigan ku jira si ay u bixiyaan tababbarka hanuuninta labada-saaca ee loo baahan yahay ee shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ee aan weli noqon Kaaliyaaasha Daryeelka Guriga ee la aqoonsan yahay.

Hanuunintan waa hanuunin guud. Loo-shaqeeyayaasha waa in ay ku daraan siyaasadahooda iyo habraacyadooda si ay hanuuninta uga dhigaan mid ku habboon hay'adooda gaarka ah. Dokumentigan waxaa uu leeyahay meel bannaan oo shaqaalaha daryeelka muddada-dheer uu qoraalladiisa ku qoran karo. Haddii aad u baahan tahay meel bannaan dheeraad ah oo aad wax ku qorato, waxaad nuqullo dheeraad ah ka daabacan kartaa bogga 50aad. Loo-shaqeeyayaasha waxay dokumentiga oo dhan u adeegsan karaan sida uu yahay ama waxaa ay macluumaadka u qaabeyn karaan qaabha ay rabaan.

Hanuunintan waxaa ay ka hadlaysaa mowduuciyada uu Xeerka Maamulka ee Washington u baahan yahay. Qof walba waxaa uu leeyahay waxyaabo uu shakhsi ahaan u baahan yahay iyo dookhyo. Had iyo jeer dhageyso xirfadaha iyo aqoonta cusub ee uu shaqaalahaagu u baahan yahay si ay uu u sii wanaajiyo daryeelkiisa. Ku dhiirrigeli loo-shaqeeyahaaga in uu wax ka oggaado oo uu qiimeeyo dadka ay taageeraan.

Waa maxay hanuuninta shaqaalaha daryeelka muddada-dheer?

Hanuunintu waa tallaabada koowaad si loogu guuleysto in shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ee cusub uu hay'adda

ku soo biirro. Hanuunintu ma ahan hawsha waraaqaha maamulka ama shaqaalaha. Waa hordhaca shaqada daryeel-bixinta iyo doorka shaqaalaha daryeelka muddada-dheer. Sidoo kale waa fursad aad xiriir kula yeellan karto shaqaalahaaga cusub iyo si aad ugu soo celiso hay'adaada.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ku soo biirista guusha leh, ka eeg Buugga Shaqo Ku-negaanshaha Shaqaalaha Daryeelka Muddada-dheer [carelearnwa.com](#).

Maxay hanuuninta iyo tababbarka bedqabka muhiim u yihiin?

Waqtiga aad ku bixiso hanuuninta wax-ku-oolka ah iyo tababbarka bedqabka waa maalgashi aad ku sameysay shaqo ku-negaanshaha shaqaalaha iyo bedqabka shaqaalaha iyo macaamiisha. Waxay shaqaalaha tusinaysaa in ay muhiim u yihiin adiga iyo hay'adaada, waxayna muujinaysa hab-dhaqanka iyo la-tacaamulkaaga hore ee xiriirkaaga. Sidoo kale waa maalgalin is-bixinaysa:

- Waayo-aragnimada ku soo biiridda wanaagsan waxay shaqo ku-negaanshaha kordhin kartaa boqolkiiba 82.
- Sheegashooyin badan oo magdhowga shaqaalaha ah ayaa dhaca labada toddobaad ee ugu horreeya shaqaaleyntooda. Dhaawacyada soo gaara dhabarka, kufidda iyo meel ka soo dhicidda badanaa waxaa sabab u ah tababbar la'aanta. Dhaawacyadan waxay saameeyaan shaqaalaha, hawl-wadeennada iyo xitaa waxaa ka mid noqon kara dhaawac soo gaara macmiilka.
- Waxaa kaaga bixi kara boqolkiiba 16-20 ee mushaarka sanadlaha daryeelaha si aad u beddesho (qorista, wareysiga, tababbarka).

Sidee loo-shaqeeyayaasha u bari karaan hanuuninta?

Dokumentigan hanuuninta loogu ma talagalin shaqaalaha daryeelka muddada-dheer in uu kaligiisa akhriyo. DSHS ma oggola hanuuninta in uu qofka kaligiisa is-baro.

Sida wanaagsan, shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ee cusub waa in uu hanuuninta ku haggaa macallin qof ahaan aha ama iyadoo la adeegsanayo koorsada internet-ka ka dhaceysa ee ay DSHS oggolaatey. Waa in ay noqotaa waayo-aragnimo laga qaybgalo oo ku dhiirrigelinaysa daryeelka in uu ka qaybgalo oo uu su'aalo weyddiyo.

Guriga yar, tababbarka hanuuninta waxaa uu ka dhici karaa hareeraha miiska jilada iyadoo milkiilaha guriga uu la hadlayo hal shaqaalaha daryeelka muddada-dheer, isagaa dokumentigan u adeegsanayo guudmarka wadhadalka. Xarunta weyn, shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ee cusub oo dhowr ah aayaa ku wada baran kara fasal, iyadoo dokumentigan loo adeegsanayo buug akhris ahaan iyadoo macallinka/baraha uu soo-jeedin sameynayo.

Yaa u baahan in uu hanuunintan qaato?

Shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ee aan weli noqon Kaaliyaha Daryeelka Guriga ee shahaaddada haysta waa in uu dhammeystaa laba saacadood oo hanuunin ah iyo saddex saacadood oo tababbarka bedqabka ah ka hor inta aaney daryeel u fidin macaamiisha ([WAC 388-112A](#) iyo [WAC 388-71](#)).

Yaa dad bari kara hanuunintan?

Guryaha qoyska qaangaarka, xarumaha adeegyada la wanaajiyay iyo xarunta xannaaneynta waayeelka iyo naafada waxaa loo oggol yahay in ay dad baraan tababbarka Hanuuninta iyo Bedqabka marka ay shatiga qaataanba ama marka isbeddel ku yimaado milkiyadda.

Hay'adaha daryeelka guriga waa in ay noqdaan barnaamijyada tababbarka baraha bulshada ee la oggolaaday si ay u tabbabaaran shaqaalahooda. Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah, booqo [dshs.wa.gov/altsa/training/home-care-agencies](#). Macallimiinta bulshada ee doonaya in ay dhigaan oo ay dad baraan Hanuuninta iyo Bedqabka waa in ay ansixisaa Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaad.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ansaxinta manhajka iyo macallimiinta, booqo [dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/training-requirements-and-classes](#).

Halkee ayay loo-shaqeeyayaashu ka heli karaan tababbarka bedqabka ee saddexda-saacadood soconaya?

Agabka tababbarka bedqabka saddexda-saacadood ee shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ayaa laga soo degsan karaa [dshs.wa.gov/altsa/training/dshs-curriculum-and-materials-available](#).

Macallimiinta miyay bixiyaan shaahaadooyin loogu talagalay tababbarka hanuuninta iyo bedqabka oo kala gaar ah ama mid kuwo wadajir ah?

Shahaadooyinka tababbarka hanuuninta iyo bedqabka ayaa la heli karaa laba shahaado oo kala gaar ah ama wadajirkooda oo hal shahaaddo wata. La xirii qaybta tababbarka haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah.

- Barnaamijyada tababbarka xarunta: trainingapprovaltpc@dshs.wa.gov
- Barnaamijyada tababbarka Macallinta Bulshada: trainingapprovaltpc@dshs.wa.gov

Daabicidda Agabkan

Dokumentigan waxaa loo nakh-shadeeyay in uu noqdo mid "daabacaad-u-wanaagsan." Xagga dambe ee sawirka iyo midabka ayaa la hagaajiyaa si loo dhaqaaleeyo khadda. Waxaad ku daabici karaa midab ama midab cawlan (madow iyo cadaan).

Mahadsanid!

Inteenna badan waxaan u baahan doonnaa daryeel muddo dheer soconaya waqti nolosheenna ah. Loo-shaqeeyaha iyo tababbaraha shaqaalaha daryeelka muddada-dheer, waxaad horumarinaysaa cuddada shaqaalaha xirfadda iyo naxariista leh ee aan ku tiirsanahay. Ganacsiyadiinna iyo ururadiina waxay ilaaliyaan madax-banaanideenna, caafimaadkeenna iyo wanaageenna waxayna abuuraa shaqooyin ammaan ah, oo abaalmarin badan leh oo loogu talagalay daryeelayaasha.

Waad ku mahadsan tihiin dhiirrigelintiinna doorashada, madax-banaanida, iyo bedqabka sidaa daraadeed waxaan dhammaanteenna ku noolaan karnaa caafimaad wanaagsan, madax-bannaanida, sharafta iyo xakameynta go'aamada saameeya nolosheenna.

Hordhaca Hanuuninta

Waxaan kuugu hambalyeynayaa shaqadaada cusub ee shaqaalaha daryeelka muddada-dheer! Waxaad bilaabaysaa safarka abaal-marinta ee daryeel-bixinta xirfadeed. Waa in aad hanuunintan dhammeysataa ka hor inta aadan daryeelka bixin. Waxaa lagu bixin doonaa hordhaca aasaasiga ah ee mowduucyadan soo socda:

- Dadka aad taageerto
- Xuquuqaha macmiilka iyo degganaha
- Goobaha daryeelka
- Mas'uuliyadahaaga shaqo ee aasaasiga ah
- Qorshaha daryeelka macmiilka
- Wadahadalka
- U-fiirsadashada, diiwaangelinta iyo ka-warbixinta
- Ka-warbixinta khasabka ah
- Is-daryeelidda loogu talagalay adiga, daryeelaha
- Shuruudahaaga dheeraadka ah ee tababbarka iyo shahaaddo-qaadashada

Loo-shaqeeyahaaga ayaa ku siin doona macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mas'uuliyadaha shaqadaada. Dokumentigan wuxuu leeyahay meel aad ku qoran karto qoraallada ku saabsan habraacyada iyo siyaasadaha loo-shaqeeyahaaga.

Qodobbada muhiimka ah waxaa ay ka soo muuqanayaan sanduuqyada kuwan oo kale ah.

Erey-bixin: Macaamiisha iyo Daryeelayaasha



Macmiilka: Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ayaa ereyga macmiil u isticmaasha dadka taageerada hela. Degganaha, ka-qaybgalaha adeega, iyo adeegsadaha ayaa ah summadaha kale ee laga yaabo in aad maqasho. Hanuunintan waxay ereyga macmiil u adeegsataa dadka daryeelka hela. Dad badan ma jecla in loogu yeero ereyga macmiil. Baro dadka aad taageero oo adeegso ereyga ay doorbidayaan.

Shaqaalaha Daryeelka

Muddada-Dheer: Waxaa sidoo kale jira magacyo badan oo loogu yeero qofka daryeelka bixiya. Tusaalooyin waxaa ka mid ah shaqaalaha daryeelka muddada-dheer, kaaliyaha daryeelka guriga*, ama daryeelaha. Hanuunintan, waxaan ku adeegsanaa shaqaalaha daryeelka muddada-dheer.

**Kaaliyaha Daryeelka Guriga waxaa loola jeedaa shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ee soo dhammeystay tababbarkooda 75 saacadood ee dhammeystiran, kana gudbay imtixaannada xirfadaha iyo aqoonta, oo ka qaatay isla-markaana gacanta ku hayo shahaaddada kaaliyaha daryeelka guriga Waaxda Caafimaadka.*

Dadka Aad Taageerto

Intenna badan waxaan u baahan doonaa daryeel iyo taageero waqti nolosheenna ah. Maanta, waxaa jira in ka badan 70,000 oo qof qaangaar ah oo Washington ku qaata adeegyada daryeelka muddada-dheer, dad badan oo annaga naga mid ahna waxay sanad walba u baahan yihiin daryeel. Waxaan leenahay waayo-aragnimo nololeed, dhaqamo, isirro, luuqado, aqoonsiyo jinsi iyo awoodo kala duwan. Waxaan u baahan karnaa caawimaadda daryeelka nafteenna iyadoo ay sabab u tahay caqabadaha dhimirka, shaqeynta iyo/ama jirka. Shaqaalaha daryeelka muddada-dheer waxaa ay naga caawiyaan joogteynta heerkeenna ugu sarreeya ee madax-bannaanida annaga oo bixinayna taageerada aan u baahanahay.

Qof walbaa wuxuu leeyahay baahiyo gaar ah. Dhaawaca, jirrada, cudurka iyo isbeddellada awoodda ayaa ka dhigi kara hawlaha nolol maalmeedka kuwa adag oo aan caawimaad la'aan la sameyn karin. Qaar ka mid ah xaaladaha guud ee ay qabaan dadka qaataa adeegyada daryeelka muddada-dheer waxaa ka mid ah:

- Daawacyada maskaxda ee qarracan
- Dhaawacyada ka dhashey kufidda
- Naafonimada koritaanka
- Xaaladaha caafimaadka dhimirka ama hab-dhaqanka
- Luminta xusuusta, maqalka ama aragga
- Hoos-u-dhaca caafimaadka jirka

Kooxda Daryeelka Macmiilka

Kaligaaga ma ahan cida daryeelka iyo taageerada siinaysa macmiilka. Dad kale oo badan ayaa jira kuwaas oo laga yaabo in ay qayb ka noqdaan kooxda daryeelka macmiilka. Macmiilku wuxuu had iyo jeer mas'uul ka yahay kooxdooda daryeelka.

Xubnaha kooxda daryeelka waxaa ka mid noqon kara dhakhtarka/bixiyaha adeegga daryeelka caafimaadka ee macmiilka, qoyska iyo saaxiibo, qof mas'uul ka ah, shaqaalaha kale ee daryeelka muddada-her, kalkaaliyayaal caafimaad ama xirfadlayaal kale iyo/ama maamulaha kiiska ama shaqaalaha bulshada ee ka socda qaybta adeegyada Guriga iyo Bulshada ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington ama Hay'adda Degaanka ee Gaboobidda. Shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ahaan, waxaad taahy qayb aasaasi ah oo ka mid ah kooxda daryeelka macmiilka. Mid ka mid ah waajibaadyadaada ugu muhiimsan waa in aad la hadasho kooxda daryeelka inteeda kale.



Xuquuqaha Macmiilka iyo Degganaha

Tayada nolosheenna waxaa ay ku xiran tahay xorriyadda aan ku adeegsaneyno xuquuqaheenna aadanaha ee aasaasiga ah. Ma luminayno wax xuquuqo ah marka aan helno daryeelka muddada-dheer. Qayb ka mid ah mas'uuliyadaada sida shaqaalaha daryeelka muddada-dheer waa in aad oggaato oo aad ilaaliso xuquuqa xuquuqaha dadka aad taageerto.

Sharciyada federaalka iyo kuwa gobolka waxaa ay ilaaliyaan xuquuqaheenna. Xeerarka federaalka waxaa ay ku jiraan [42 CFR 441.530](#). Sharciga gobolka ee ku saabsan xuquuqaha wuxuu ku jiraa [RCW 70.129](#) (dadka ku nool xarunta xannaaneynta waayeelka iyo naafada, guryaha

qoyska dadka qaangaarka ah iyo xarumaha adeegyada la wanaajiyey). [Xeerka Maamulka ee Washington \(WAC\) 388-106-1300](#) wuxuu qeexayaa xuquuqaha macaamiisha ku jirta barnaamijka Medicaid ee adeegyada ku helaya guryahooda, iyo [WAC 246-335-435](#) waa hindise-sharciyeedka ama xuquuqaha hay'adaha daryeelka guriga.

Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah xuquuqaha ay ilaaliyeen sharciyada Federaalka iyo kuwa gobolka Washington. Liiskan ma ahan liiska dhammeystiran ee dhammaan xuquuqda ay dadku leeyihiin. Xusuusnow in aanan lumin wax xuquuqo ah marka aan helno daryeelka muddada-dheer.

Doorashada iyo Xorriyadda

Qof walba waxaa uu xaq u leeyahay...



In uu noolaado isaga oo aan la kulmin xadgudub iyo dayac.



In uu diido daryeelka, daawooyinka ama daaweynta.



In uu ku biiro hawlaha bulshada, diinta iyo bulshada.



In uu muujiyo cabasho ama walaac iyadoo aan jirin cabsi aargoosi.



In uu codsado war-iswaarsiin in uu helo (turjumaanada luuqadda turjumaadda, qalabka war-iswaarsiinta caawimaadda leh).



In uu noqdo qof u firfircoon sameynta ama beddelka qorshahiisa daryeelka



In uusan la kulmin xakameynta jireed ama kiimiko.



In uu maareeyo maaliyadihiisa.



In uu doorto hawlahiisa, jadwaladiisa (oo ay ku jiraan waqtiyada raashiinka iyo marka daryeelka la siiyo), daryeelka caafimaadka, dharka iyo habka timo qurxinta.



In uu dad kula kulmo gudaha iyo bannaanka meesha uu deggan yahay oo ay ku jiraan qoyska, saaxiibada, dhakhtarkooda iyo difaacayaasha xuquuqda dadweynaha (u-qarameeya dadka hela daryeelka muddada-dheer).

Yaa xaq u leh in uu kuu sheego waxa aad sameyn karto iyo waxa aadan sameyn karin, cidda aad booqan karto, iyo cidda aad ku marti-qaadi kartid gurigaaga?

Ilaalinta Sirta

Macaamiisha waxay xaq u leeyihiin in mid qarsoon laga dhigo diiwaannadooda shakhsiyeed iyo kuwa caafimaad. Kuwani waxaa ka mid ah macluumaadka ku saabsan qabanqaabooyinka nololeed, daaweynta caafimaad, maaliyadaha iyo daryeelka shakhsiyeed. Dhammaan xubnaha kooxda daryeelka waa in ay raacaan shuruucda ilaalinta sirta iyo anshaxa xirfadeed marka ay macaamiisha la munaaqashayaan.

Ilaalinta Sirta Macmiilka

Ilaali sirta mar kasta oo aad ka shaqeynayso diiwaannada macmiilka ama aad macmiilka arrintiisa ka hadlayso.

- Diiwaannada macmiilka ha uga tagin meel ay dadka kale ka ari karaan.
- Diiwaannada elektarooniga ah ha uga tagin shaashadaha kombiyuutarka oo ay dadka kale ka arki karaan.
- Ha uga hadlin macluumaadka sirta ah ee macmiilka meel ay dadka kale kaa maqli karaan.
- Isla-markiiba galkooda ku celi diiwaanno kasta oo macmiilku leeyahay ka-dibna geli goobta ku habboon marka aad ka dhammeysato.
- Ka warqab cidda goobta joogta marka aad dib-u-eegayso, ka hadlayso ama cusboonaysiinayso diiwaannada macmiilka.

- La-wadaag macluumaadka caafimaadka, maaliyadda ama macluumaadka kale ee shakhsiyeed ee ku saabsan macmiilka kaliya xubnaha kooxda daryeelka ee habboon haddii macmiilka uu bixiyo oggolaansho qoraal ah mooyaane.



- Macluumaadka oggolaansho weyddii ka hor inta aadan macluumaadkooda wadaagin.
- Ha kala hadlin waxa aad ka ogtahay macmiilka qof aan ka tirsanayn kooxda daryeelka haddii macmiilka uu bixiyo oggolaansho qoraal ah mooyaane.
- Macmiilka wuxuu had iyo jeer arki karaa diiwaannadiisa. Macmiilka sir ha uga dhigin diiwaannadiisa.

Xeerka Isla-xisaabtanka iyo Caymiska Caafimaadka ee La-qaadi Karo

HIPAA waa sharci federaal oo maamula isticmaalka iyo wadaagista macluumaadka caafimaadka. Yoolka weyn ee laga leeyahay HIPAA waa in la ilaaliyo macluumaadka caafimaadka ee qofka iyadoo weli loo saamaxayo kooxda daryeelka in ay wadaagto macluumaadka lagama maarmaanka ah si loo bixiyo daryeel caafimaad oo tayadiiso sarreyso. Loo-shaqeeyahaaga ayaa kula eegaya waxa aad u baahan tahay in aad ka oggaato si aad u raacdo xeer-nidaamyada HIPAA ee lagu dabakho shaqadaada.

Waa maxay tallaabooyinka ay tahay in aad qaado si aad u raacdo shuruucda HIPAA ee doorkaaga?

Asturnaan

Asturnaanta shakhsiyeed iyo midda jireed waxaa ay naga caawinaysa in aad bedqabno oo aan madax-banaanaano. Asturnaan la'aan, waxaa nahay dad nugul oo la kulmi kara ceeb ama waji-gabax. Ilaalinta asturnaanta macmiilka waxay aasaasi u tahay daryeel-bixinta tayada leh

Ilaalinta Asturnaanta Macmiilka

Had iyo jeer ka fikir sida aad u ilaalin doonto asturnaanta macmiilka inta lagu guda jiro daryeelka jireed iyo waqtiyo gaar ah.

- Gargaraac ka hor inta aadan galin qolka albaabkiisu xiran yahay oo sug ilaa lagaaga oggolaado in aad soo gasho.
- Xir daaqadaha, daahyada, albaabada iyo il-xirka/dadabka ka hor inta aadan bilaabin hawlaha daryeelka shakhsiyeed.
- Hubso in macmiilka uu raaxo ku dareemayo qof walba ee qolka ku jira ka hor inta aadan bilaabin daryeelka shakhsiyeed, sida dadka soo booqanaya ama kuwa ay isku qolka yihiin.
- Intii suuragal ah dabool jirka macmiilka marka aad qabaneyso hawlaha daryeelka shakhsiyeed.
- Macaamiisha haka qaadin sawirro, fiidiyowyo ama duubis.
- Hubso macmiilka in asturan yahay xilliga wacitaannada telefoonka, wacitaanka fiidiyowga ah, dirista farriimaha internet-ka la isugu gudbiyo, isticmaalka kombiyuutarka, marka ay la joogaan dad soo booqday iyo marka ay furayaan warqadaha boostada ama emailka loogu soo diray.

Ilaali asturnaanta.



Xuquuqaha Degganaha

Sharciyada waxay ilaaliyaan xuquuqda dadka ku nool guryaha qoyska qaangaarka ah, xarunta Xannaaneynta waayeelka iyo naafada iyo xarumaha adeegyada la wanaajiyey.

Degganayaasha waa in luuqad ay fahmayaan loogu sheegaa xuquuqahooda. Xuquuqahan waxaa ka mid ah, laakiinse aanan ku xaddidnayn, kuwan soo socda:

- Xaqa ay u leeyihiin in ay helaan macluumaadka ku saabsan xarunta sida warbixinnada baaritaanka iyo sida cabashada loo gudbiyo.
- Xaqa ay u leeyihiin in ay helaan diiwaannadooda.
- Xaqa ay u leeyihiin deegaan ammaan ah, nadiif ah, raaxo leh oo kan guriga oo kale ah.
- Xaqa ay u leeyihiin in albaabada gurigooda loo yeelo qufullo/sakatuurad, iyadoo hawlwadeennada ku habboon oo kaliya ay fure haystaan.
- Xaqa ay u leeyihiin in la soo booqdo.
- Xaqa ay u leeyihiin in ay haystaan hantidooda shakhsiyeed.
- Xaqa loo leeyahay in la soo gudbiyo cabshooyin rasmi ah oo xarunta ku saabsan.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqa degganaha, eeg sharciyadan iyo xeerarkan soo socda:

- Xuquuqaha degganaha: [RCW 70.129](#)
- Guryaha qoyska qaangaarka ah: [WAC 388-76](#)
- Xarumaha xannaaneynta waayeelka iyo naafada: [WAC 388-78A](#)
- Xarunta adeegyada la wanaajiyey: [WAC 388-107](#)

Difaacayaasha Xuquuqda Dadweynaha iyo Ururrada U-qareemeynta

Difaacayaasha xuquuqda dadweynaha waxaa ay baaraan cabashooyinka waxayna dadka ka caawiyaan hagitaanka nidaamyada sida daryeelka muddada-dheer. Xafiisyada difaacayaasha xuquuqda dadweynaha iyo ururrada u-qareemeynta ee Washington waxaa ay mareegtooyinkooda ku wadaagaan macluumaad qiimo leh iyo kheyraadyo. Wax ka oggaanshaha difaacayaashan xuquuqda dadweynaha iyo kooxahan u-qareemeynta waxaa ay kaa caawin kartaa ilaalinta xuquuqaha dadka aad taageerto.

Barnaamijka Difaacayaasha Xuquuqda Dadweynaha ee Daryeelka Muddada-Dheer ee Gobolka Washington

Xafiiska Difaacayaasha Xuquuqda Dadweynaha ee Daryeelka Muddada-Dheer waxaa uu wax ka qabtaa cabashooyinka wuxuunna u doodaa dadka daryeelka ku dhex qaadanaya rugaha lagu xannaaneeyo dadka waaweyn, xarumaha xannaaneynta waayelka iyo naafada, iyo xarumaha jiifka iyo cuntada leh iyo guryaha qoyska qaangaarka ah.

waombudsman.org

ltcop@mschelps.org

800-562-6028

253-815-8173

Xafiiska Difaacayaasha Xuquuqda Dadweynaha ee Naafonimada Koritaanka

Difaacayaasha Xuquuqda Naafonimada Koritaanka waxay dib-u-eegaan cabashooyinka iyagoo ka wakiil ah dadka qaba naafonimada Koritaanka ee hela adeegyada gobolka.

ddombuds.org

info@ddombuds.org

833-727-8900 (Khadka Cabashada)

Adeegyada War-lalinta Washington 711 (TTY)

Xafiiska U-qareemaynta Caafimaadka Habdhaqanka

Xafiiska Caafimaadka Habdhaqanka wuxuu taageeraa shakhsiyaadka iyo qoysaskooda ee uu loogu adeego laguna taageero nidaamka caafimaadka habdhaqanka ee Gobolka Washington.

obhadvocacy.org

info@obhadvocacy.org

360-292-5038

Xuquuqda Naafonimada ee Washington

Xuquuqda Naafonimada ee Washington waxay adeeyo bilaash ah siisaa dadka naafada ah.

"Waxaan nahay urur aan faa'iido u shaqeyn oo gaar loo leeyahay kaas oo ilaaliya xuquuqaha dadka naafada ah ee gobolka oo dhan. Hiigsigeenna waa in la horumariyo sharafta, sinnaanta, iyo aayo-katalinta dadka naafada ah. Waxaan cadaalad u raadinaa arrimaha la xiriira xuquuqaha aadanaha iyo sharciga."

disabilityrightswa.org

info@dr-wa.org

800-562-2702

206-324-1521

Adeegyada War-lalinta Washington 711 (TTY)

Goobaha Daryeelka

Intenna badan waxaan doorbidaynaa in aan ku negaano guryaheenna iyo bulshooyinkeenna marka aan daryeel u baahannahay. Ku dhowaanshaha qoysaskeenna, saaxiibadeenna iyo xayawaannadeenna rabbaayadda ah, iyo ka-qaybgalka hawlaha wax-ku-oolka ah ayaa sii wanaajiyaya tayada noloseenna. Nooca goobta daryeelka ee uu macmiilka doorto waxay ku xiran tahay adeegyada iyo taageerada uu u baahan yahay.

Daryeelka Guriga Gudahiisa

Qofka ku nool gurigiis ama abaarmankiisa wuxuu u shaqaaleysiisan karaa shaqaalaha daryeelka muddada-dheer in uu ka taageero hawlaha nolol maalmeedka. Macmiilka wuxuu sidoo kale heli karaa adeegyo dheeraad ah sida kalkaalin ama daryeel caafimaad kale oo xirfad ku saleysan sida Adeegyada Raashiinka Guryaha Ugu Geeya Waayeelka iyo Naafada, guriga lagu xanaaneeyo bukaanka, goobta sida ku-meelgaarka ah loogu xanaaneeyo bukaanka, naafada iyo waayeelka, wax-ka-beddelka guryaha, war helidda iyadoo la adeegsanayo tarjumaannada luuqadda dhegoolayaasha, tiknoolajiyadda dadka ka caawisa maqalka, ama qalabka caawimaadda iyo digniinta bixiya.

Daryeelka Degaanka

Daryeelka degaanka waa ikhtiyaar kale oo loogu talagalay macmiilka hela adeegyada daryeelka muddada-dheer. Guryaha qoyska qaangaarka ah, xarumaha xannaaneynta waayeelka iyo naafada iyo xarumaha adeegyada la wanaajiyey waa saddex tusaale oo ka mid ah daryeelka degaanka bulshada ku saleysan.

Goobahan degaanka ah waxay bixiyaan qol jiif ah, raashiin, dhar-dhaqid, kormeer iyo caawimaad daryeel. Intaa waxaa dheer, in xarumaha qaarkood ay bixiyaan daryeel kalkaalin marmar ah iyo/ama daryeel takhasusi ah oo loogu talagalay dadka la ildaran arrimaha caafimaadka dhimirka ama hab-dhaqanka, naafonimada koritaanka, wax maqli waayidda ama waallida.

Guryaha qoyska qaangaarka ah waa guryaha xaafadda ee daryeelka siin kara laba ilaa siddeed qof. Xarumaha xannaaneynta waayeelka iyo naafada guud ahaan waa xarumo waaweyn oo bulshada ku yaalla kuwaas oo ay degi karaan toddobo ilaa boqollaal qof. Xarumaha adeegyada la wanaajiyey waa xarumo degaan ah oo loogu talagalay ilaa lix-iyo-toban qof lehna hawladeenno gaar ah iyo adeegyo degdeg ah oo diirrada saaraya waxqabadyada hab-dhaqanka.

Gobolka Washington wuxuu shatiyo siiyaa oo uu ilaaliyaa nidaamka daryeelka muddada-dheer si uu gacan uga geysto xaqiijinta daryeel tayo leh, joogto ah iyo adeegyo loogu talagalay macaamiisha oo dhan. Waxaad xeer-nimaadyadan ka heli kartaa [WAC 388-76](#) oo loogu talagalay guryaha qoyska qaangaarka ah, [WAC 388-78A](#) oo loogu talagalay xarumaha xannaaneynta waayeelka iyo naafada, [WAC 388-107](#) oo loogu talagalay xarumaha adeegyada la wanaajiyey iyo [WAC 246-335](#) oo loogu talagalay hay'adaha daryeelka guriga.



Guri, xarun ama hay'ad kasta waxaa ay leeyihiin yoolal iyo falsafad ganacsi oo u gaar ah. Fahamka himilada loo-shaqeeyahaaga waxaa ay kaa caawinaysaa in aad faham wanaagsan u yeelato shaqadaada iyo filashooyinka loo-shaqeeyahaaga.

Dhammaan bixiyayaasha adeegyada daryeelka muddada-dheer waa in ay ka soo baxaan jaangooyada ugu yar ee waafaqsan xeer-nidaamyada kor ku xusan. Ma jiro guri, xarun, ama hay'ad qofka ugu baahan in uu xuquuqahiisa ka tanaasulo.

Mas'uuliyadaha Shaqada Aasaasiga ah ee Shaqaalaha Daryeelka Muddada-Dheer

Qaar ka mid ah mas'uuliyadaha shaqo ee aasaasiga ah ee aad yeellan doonto sida shaqaale daryeel muddo-dheer ahaan waa:

1. **Mudnaanka Koowaad Waa Bedqabka!** Noqo qof u ololeeya bedqabka qof walboo jooga goobtaada shaqada. Dhammeyso tababbarka bedqabkaaga oo baro siyaasadaha loo-shaqeeyahaaga. Ka fikir bedqabka jireed iyo midka dareen ee macmiil kasta. Jooji faafitaanka jeermiska. Aqoonso khataraha ama dhibaatooyinka oo wax ka qabo ka hortagga shilalka.
2. **Faham baahiyada daryeel ee macmiilka.** Hawlaha u qabo si sax ah, hufan oo ah sida ku qoran qorshaha daryeelka macmiilka ama heshiiska adeegga laga soo gorgortamey.
3. **Ixtiraam oo raac doorashooyinka macmiilka.** Ogow sida iyo goorta macmiilku doorbidayo in hawlahaan loo qabto.
4. **Korjoogtee macmiilka si aad ula socoto isbeddelka xaaladiisa.** Tani waxaa ka mid noqon kara xaaladooda caafimaadka, dhimirka ama dareenka iyo/ama isbeddellada hab-dhaqanka.
5. **Diwaangeli oo ka soo warbixi isbeddelo kasta** ee aad aragto adiga oo raac habraacyada iyo siyaasadaha cidda aad u shaqeyso.
6. **Si habboon wax uga qabo xaaladaha degdegga ah** adiga oo raacaya tababbarkaaga bedqabka iyo siyaasadaha loo-shaqeeyaha.
7. **Shaqada imaaw waqtiga loo baahan yahay** mise wac kormeerahaaga haddii aadan shaqada imaan karin. In aad macmiilka ka tagto daryeel iyo taageero la'aan waxay halis-gelinaysaa caafimaadkooda, bedqabkooda, wanaagooda iyo madax-banaanidooda.
8. **Si habboon u lebis.** Kormeerahaaga weyddii xeerarka dharka ama filashooyinka ku saabsan waxa la xirto. Dharka shaqada ee aan habboonayn waxay noqon karaan khatar bedqab.
9. **Buuxi oo hayso xaashida waqtiga oo sax ah** adiga oo raacaya habraacyada iyo siyaasadaha cidda aad u shaqeyso.
10. **Ogeysii loo-shaqeeyahaaga haddii aad shaqadaada ka tageyso.** Loo-shaqeeyayaasha intooda badan waxaa ay qaddariyaan ogeysiiska qoraalka ee labada toddobaad ah. In aad si kedis ah uga tagto macmiilka daryeel la'aan waxay khatar ku tahay caafimaadkooda iyo bedqabkooda.

Waxaa intaa dheer, loo-shaqeeyahaaga waxaa uu kaa qabaa filashooyin kale sida shaqaale ahaan.

Waxqabad Shaqo

Sida aad u qabsato shaqadaada shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ahaan waxay si toos ah u saameysaa tayada noloshada dadka aad taageerto. Maalin walba, waxaad fursad u haysataa in aad macaamiisha ku caawiso in ay u noolaadaan si sharaf iyo madax-banaani leh. Haseyeeshee, daryeelaha sida liidata shaqadiisa u qabsada wuxuu macaamiisha u geysan karaa waxyeello jireed, kurbo, walaac iyo/ama waji-gabax.

Shaqadaada ku faan oo sida ugu wanaagsan shaqadaada u qabso. Marka aad shaqada joogto, shaqadaada diiradda saar. Baro sida saxda ah ee hufan ee loo qabto hawlaha lagu qoondeeyay. Ogow waxa la sameeyo iyo waxa laga fogaado. Macaamiisha iyo xubnaha kale ee kooxda daryeelka u noqo qof daacad u ah, xirfadle ah oo ay hawshiisa u cadahay.



Fahamidda Waajibaadyadaada Shaqo

Waxaad u baahan tahay in aad fahamto sida iyo goorta la sameynayo hawlo kasta ee lagu xilsaarey. Waxaad macluumaadkan ka heli karaa qorshaha daryeelka macmiilka, xubnaha kale ee kooxda daryeelka, waxaanna ugu muhiimsan in aad ka heli kartid macmiilka.

Qof walba waxbuu baranayaa marka uu shaqo cusub bilaabo. Su'aalo weyddii haddii aaney kuu caddeyn filashooyinka ama aadan garaneyn sida wax loo sameeyo.

Shaqadaada ku bilow fahamka adag ee waxa lagaa filayo.

**Waa maxay filashooyinka kale ee uu loo-shaqeeyahaaga kaa haysto?
Eeg tilmaamaha shaqadaada ama loo-shaqeeyahaaga weyddii.**

Qorshayaasha Daryeelka

Marka qofku uu bilaabo in uu helo adeegyada daryeelka muddada-dheer, waxaa ay la shaqeeyaan xubnaha kale ee kooxdooda daryeelka si loo sameeyo daraaseyn oo loo abuurto qorshaha daryeelka. Qorshaha daryeelka macmiilka wuxuu kuu sheegayaa adeegyada iyo taageerada ay doonayaan oo ay u baahan yihiin. Qorshaha daryeelka wuxuu qof walbo oo ka tirsan kooxda daryeelka ka caawinayaa in uu fahmo sida loo bixiyo daryeelka macmiilka oo ah habka uu macmiilka doorbidayo.

Qorshaha daryeelka macmiilka ayaa isbeddelaya marka baahiyada daryeelkooda iyo dookhyadoodu ay isbeddelaan. Mid ka mid ah waajibaadyadaada shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ahaan waa in aad soo sheegto oo aad ka hadasho isbeddelada aad ku aragto macmiilka iyo kooxdooda daryeelka inteeda kale. Macmiilka iyo kooxdiiisa daryeelka waxay cusboonaysiin karaan qorshaha daryeelka iyo/ama waxay raadsan karaa caawimaad maaliyadeed ama mid kale.

Qorshayaasha daryeelka waxay magacyaal kale ku leeyihiin goobaha daryeelka ee kala duwan. Iyadoo ku xiran halka aad ka shaqeeyso, macmiilka wuxuu yeellan karaa qorshaha adeegga ee uu qofku xuddunta u yahay, qorshaha daryeelka laga wada xaajoodey, heshiiska adeegga laga wada xoojoodey ama kaliya qorshe.

Waxaad heli kartaa qorshaha daryeelka oo dhan ama qaybo ka mid ah oo kaliya. Goobaha daryeelka qaar, waxaad kaliya ku arki kartaa liiska hawlaha ay tahay in la qabto. Si taxaddar leh ugu akhri dokumentiyadan macmiil kasta ee aad taageerto ka-dibna mar kale la eeg bilowga kalkan shaqo kasta isbeddel kasta ee lagu sameeyay qorshaha.



Waxaad had iyo jeer mas'uul ka tahay raacidda qorshaha daryeelka ama liiska hawlaha.

Macluumaadka ku qoran qorshaha daryeelka waa mid sir ah oo xasaasi ah. Wax kasta ee aad akhriso ama maqasho ee ku saabsan macmiilka ka dhig wax gaar ah. Waxaad gacan ka geysan kartaa yareynta raaxo la'aanta ama waji-gabaxa macmiilka adiga oo noqonaya qof xirfadle ah oo ilaalinaya macluumaadkiisa shakhsiyeed. Macmiilka wuxuu had iyo jeer xaq u leeyahay in uu arko qorshaha daryeelka ee u gaarka ah iyo wax kastoo kale ee isaga laga qorey.

Ka-hadalka Qorshaha Daryeelka ama Liiska Hawsha

Akhrinta qorshaha daryeelka waa kaliya tallaabada koowaad ee lagu fahmayo sida macmiilka loo taageero. Sidoo kale aad iyo aad ayay muhiim u tahay in aad macmiilka kala hadasho sida ay doonayaan in aad daryeelka u bixiso. Marka aad macmiilka kala hadasho daryeelkiisa, xusuusnow talooyinkan soo socda:

- Dulqaad yeelo haddii macmiilka ay ku adkaato in uu arrimahan ka hadlo.
- Macmiilka waxaa laga yaabaa in uusan la qabsan ka hadalka arrimahaasi shakhsiyeed.
- Macmiilka waxaa ku adkaan karta in uu weyddiiyo ama in uu oggolaado caawimaadda.
- Waxaa laga yaabaa in ay ku adkaato in ay sharxaan nidaam joogto ah oo ay sanado lahaayeen.
- Qofka waxaa laga yaabaa in uu waayo arag u yahay adeeg bixiyayaasha ee aan si ixtiraam leh ula dhaqmin.
- Isku-day in aad si wadajir ah u wada akhrisaan qorshahooda daryeelka. Waa hab xirfadeed oo looga hadli karo waxa ay noqon karaan mowduucyada xasaasiga ah.

Faham oo ixtiraam doorashooyinka macmiilka ee ku saabsan sida iyo goorta la bixinayo daryeelka iyo adeegyada.

Dhisidda Xiriirada

Dhisidda xiriirada lala leeyahay macaamiisha aad taageero waxaa ay kaa caawinayaan in aad fahamto, ixtiraamto oo aad ilaaliso dookhyadooda. Adiga iyo macmiilka waa in aad faham guud ka yeelataan qodobbadan soo socda:


- Ogow waxa uu macmiilka kaa filayo in aad sameyso iyo sida ay doonayaan in aad u sameyso.
- Faham sida wax ku ool ah ee la iskula hadlo.
- Faham xaddidaada shaqadaada.
- Si wadajir ah ula shaqeeya qofka si aad ugu taageertaan sida ay doonayaan.
- Xusuusnow in macmiilka uu yahay hoggaamiyaha kooxda daryeelka iyo in uu mas'uul ka yahay daryeelkiisa.

Si aad uga fogaato fahamka qaldan, kala hadal hawlaha daryeelka qofka marka koowaad ee aad shaqada bilowdo.

Daryeelka uu Qofku Xuddunta u Yahay

Inteenna badan waxaan u baahan doonaa daryeel waqti nolosheenna ka mid ah. Waxaan dhammaanteenna doonaynaa daryeelayaasheenna in ay noqdaan kuwo naxariis badan qof ahaan inoo ixtiraamka, beddelkii aan arki lahayn naafonimadeenna ama xaaladaheenna. Inta aad sii baraneyso dadka aad taageerto, xaaladda waafaji sida aad u bixinayso daryeelka si aad uga soo baxdo baahiyadooda iyo dookhyadooda gaarka ah.

- Qofka maxaa muhiim u ah?
- Maxay ku raaxaystaan?
- Maxaa ka dhigaya in ay raaxo dareemaan?
- Maxay neceb yihiin oo maxay ka baqaan?
- Waa kuwee dadka muhiimka u ah noloshooda?
- Waa maxay hab-dhaqannada ay u arkaan kuwo ixtiraam leh oo habboon?
- Waa maxay hab-dhaqannada diinta/ruuxiga ah iyo dhaqanka ee muhiimka u ah?
- Sidee ayay waayo-aragnimadooda nololeed uga dhigeen cidda ay maanta yihiin?
- Waa maxay xigmada ay leeyihiin oo ay kula wadaagayaan?



Qaddarinta Kala-duwanaanshaha

Marka aad barato dadka aad taageerto, waxaad arki kartaa in ay qiimayaal, aaminsanaan iyo aragtiyo kala duwan ka haystaan caalamka. Isku-day in aadan xukmin. Qofka ixtiraam iyo naxariis u muuji xitaa haddii aad ku waafaqsanayn.

Ixtiraamidda Dhaqanka iyo Aqoonsiga

Raadraaceenna iyo waayo-aragnimadeenna nololeed ayaa qaabeeya aragtiyada aan caalamka ka haysano. Mid kastoo ka mid ah dhinacyadan hoose ayaa saameeya aaminsanaanta, hab-dhaqanka, qiyamka iyo dabeecada aan leenahay.

- Da'da
- Naafonimada iyo/ama xaaladda awoodda
- Diinta iyo ruuxiga
- Aqoonsiga sinjiga iyo isirka
- Xaaladda bulsho-dhaqaale
- Dookha galmo
- Hiddaha (dhaladka) asaliga
- Asal ahaan dalka aad ka soo jeedo
- Muujinta iyo aqoonsiga jinsiga
- Kooxaha bulshada

Ka fogaanshaha xukminta ama sameynta mala-awaalka ku saabsan dadka oo ku saleysan arrimaha aqoonsigooda, oo ha isku-dayin in aad dadka bedesho (diintooda ama dookhooda galmo, tusaale ahaan). Taa beddelkeeda, macmiil kasta qof ahaan u baro. Baro waxa ixtiraamka uu la yahay oo ula dhaqan sida ay doonayaan in loola dhaqmo.



Su'aalo Weyddii

Weyddiinta su'aalo wanaagsan waa fan. Weyddiinta su'aalo wax-ku-ool ah ayaa ku helayaa macluumaad badan oo aad u baahan tahay.

?	Weyddii su'aalo gaar ku ah hawsha.	"Subaxan miyaad doorbidaysaa qubeys ama bilbilasho?"
?	Weyddii su'aalo daba-furan beddelkii aad weyddiin lahayn su'aalo loogu jawaabi karo haa ama maya.*	"Maxaad jeclaan lahayd in aad ku quraacato?" waxaad ku helayaa macluumaad ka wanaagsan haddii aad weyddiin lahayd "Quraac hadda ma rabtaa?"
?	Weyddii su'aalaha ku bilowda maa maxay, waa goormaa, waa halkee, maxay tahay sababta iyo sidee./	Tusaale ahaan, qorshaha daryeelka ayaa dhigaya in aad ka caawinayso qubeys. Weyddii su'aalaha sida: "Sidee ayaa jeclaan lahayd in ay u kululaadaan biyaha aad ku qubeysato?" "Waa maxay nooca saabuunka ee kuu wanaagsan?"

*Su'aalaha haa ama maya waxaa laga yaabaa in ay fudud yihiin ama ay aad ugu habboon yihiin dadka la nool cudurka waallida ama xaaladaha kale ee garashada.

Weyddiinta su'aalaha wanaagsan waxaa ay kaa caawinayaan in aad hesho macluumaadka aad u baahan tahay in aad si sax ah shaqadaada ugu qabato.

Samee nidaam joogto ah

Jadwalka ama nidaamka joogtada ah wuxuu kaa caawin karaa in aad dhammeyso hawlahaaga oo dhan wuxuunna macmiilka ka caawin karaa in uu raaxo ku dareemo oggaanshaha waxa la filayo.

Marka aad bilowdo xiriir daryeelbixin cusub oo aad qof la yeelanayso, kala shaqee diyaarinta nidaam joogto ah ka-dib raac marka aad daryeelka bixiso.

Nidaamyada joogtada ah ayaa caawiya adiga iyo macmiilka.



Mar Kale Weyddii

Ka-dib marka aad muddo macmiilka la shaqeyso, mar kale kala hadal sida aad u sameynayso hawlaha ku jira qorshaha daryeelka. Ma jiraan wax ay jeclaan lahaayeen in aad sida hadda si ka duwan u sameyso?

Marka aad mar kale weyddiiso, waxaad xaqiijin kartaa in aad fahamsan tahay nidaamka joogtada ah ee uu macmiilku doorbidayo in aad hawlaha u sameyso sida iyaga u wanaagsan.

In Aad Mar Kale Weyddiiso Waxaa ay Kaa Caawinaysaa:

- In aad xaqiijiso in aad fahamsan tahay nidaamka joogtada ah ee macmiilka.
- In aad ugu caawiso hawlaha sida wanaagsan ee ay macmiilka u shaqeyso.
- In aad wax badan ka ogaato dookhyada macmiilka.
- Hel jawaab-celinta sida ay hawshaadu tahay.

Mar kale weyddii si aad u oggaato in aad shaqadaada si fiican u qabsatey.

Wadahadalka

Wadahadalka wanaagsan wuxuu kaa caawinayaa in aad bixiso daryeel tayo leh iyo in aad shaqadaada ka dhigto mid fudud. Wadahadalka wanaagsan wuxuu dhisaa kalsoonida iyo isfahamka u dhaxeeya adiga, dadka aad taageerto iyo qof kastoo kale ee aad la shaqeeyso. Wadahadalka wanaagsan sidoo kale:

- Waxaad ku helaysaa macluumaadka aad u baahan tahay si aad shaqadaada u qabsato.
- Wuxuu waxyaabaha ka dhigaa in ay si habsami la'aan ah ugu socdaan macmiilka iyo xubnaha kale ee kooxda daryeelka.
- Wuxuu qof walba ka caawinayaa in uu isdejiyo xaaladaha walaaca leh.
- Dadka kale ka caawinayaa in ay kuu arkaan xirfadle ahaan.

Wadahadalka wanaagsan wuxuu dhaafsiisan yahay in uu yahay hadal oo kaliya. Tixgeli talooyinkan soo socda:

- Si taxaddar leh u daawo jir ka hadalka macmiilka si loo arko waxa falalkooda iyo baaqyadooda laga yaabo in ay sheegayaan.
- Si taxaddar leh u dhageeyso faallooyin kasta ee ka imaanaya macmiilka.
- Iskuday in aad yareeyso waxyaabaha kaa jeedinaya ee deegaanka. Qaylada xagga dambe ka yeeraysa iyo iftiinka liita waxaa ay wadahadalka ka dhigi karaan kuwo adag.
- Si toos ah ula hadal macmiilka naf-ahaantiisa. Macmiilka ha uga hadlin sida in aanu halkaa joogin.
- Dulqaad yeelo oo hadalkaaga ugu celceli hadba sida loogu baahdo.

War-isgaarsiinta wanaagsani waxay aasaasi u tahay daryeel-bixinta.

Wadahadalka Ixtiraamka Leh

In macmiilka si ixtiraam leh loola hadlo waxay gacan ka geysanaysaa dhisidda kalsoonida waxayna ka dhigeysaa in uu wanaag ka dareemo xiriirka uu kala leeyahay. Marka aad macmiil la hadlayso, xusuusnow in aad raacdo tilmaamahan soo socda:

- Dadka qaangaarka ah ula dhaqan sida dad qaangaar ah oo kale. Ha adeegsanin hadalka carruurta ama ha ula hadlin dadka aad taageerto in aad yaseeyso oo kale.
- Isticmaal codkaaga caadiga ah.
- Ku hadal dhawaaqa codkaaga caadiga ah marka hore ka-dibna waafaji baahiyadooda.
- Ka fogaaw adeegsiga naaneysyada sida malabey, macaanto ama ayeeyo. Qofka weyddii waxa uu jeclaan lahaa in aad ugu wacdo.
- Fiiri gaar ah u yeelo sida macmiilka uu doorbidayo in aad ula hadasho oo waafaji habka aad u hadleyso waxa iyagga u shaqeeya.
- Marka aad taabaneyso ixtiraam u muuji. Had iyo jeec macmiilka weyddiiso fasax ka hor inta aadan taaban. Hubso in aad taqaano dookhyada macmiilka iyo siyaasadda u dejisan loo-shaqeeyahaaga ee ku saabsan taabashada. Marnaba qofka qaangaarka ah haka taaban/ salaaxin madaxa sida carruurta oo kale.



Wadahadalka Wanaagsan/Togan

Wadahadalka wanaagsan waxaa uu qofka tusinayaa in aad daneynayso wuxuunna ka caawinayaa in uu dareemo in la taageero. Iskuday in aad wanaag muujiso xitaa xaaladaha adag ama uu jahwareerka jiro. Qofka xusuusi in aad dooneyso in aad caawiso oo u sharrax caqabadaha ku haysta. Weyddii in ay kaala shaqeeyaan xallinta dhibaatooyin kasta si aad u xaqiijiso in ay helaan daryeelka ay u baahan yihiin.

Iskuday in aad hesho hal shay oo wanaagsan si aad macmiilka ula dabaandegto maalin kasta, xitaa haddii uu yahay waxyar. Marka macmiilku uu wanaag muujiyo, uu ka guulgaarro wax ama uu kaliya sameeyo isku-day wanaagsan, waqti ku qaado in aad ixtiraamto awoodooda iyo dadaalladooda.

Ka-soo-bixidda Baahiyada Wadahadal ee Macmiil Kasta

Mid kasta oo annaga naga mid ah wuxuu u hadlaa si u gaar ah oo ku saleysan arrimo kala duwan sida dookha, dhaqanka, kala duwanaanshaha luuqadeed ama xaaladaha saameeya maqalka, hadalka ama fahamka. Qorshaha daryeelka macmiilka waxaa ku jira baahiyadiisa wadahadal iyo dookhyadiisa. La shaqee loo-

shaqeeyahaaga oo adeegso kheyraadyada la heli karo si loo daboolo baahiyada wadahadal ee macmiilka. Hubso in aad fahamto sida macmiilka kasta uu uga hadalo dookhiisa.

Tusaalooyinka qaar ee xaalad waafajinta waxaa ka mid ah suuragelinta tarjumaad loogu talagalay macmiilka adeegsada luuqad kale, isticmaalka waxyaabaha kaaba wadahadalka sida sabuuradda cad, qalabka fara-riixa leh ama bikaacooyinka elektarooniga ama gacanta lagu adeegsado ee loogu talagalay macaamiisha la soo gudboonaadey xaalado garasho sida istaroog, dhaawaca maskaxda ku dhaca ee qarracan ama waalli.

Toosinta Filashooyinkaaga

Xaaladaha garashada iyo dhaawaca maskaxda ee qarracan ayaa badanaa saameeya sida uu qofku isu muujiso/u sheegto baahiyadiisa. Waxaa ay u hadli karaan siyaabo aadan filaynin ama raaxo ku dareemin. Noqo qof u furan barashada ku saabsan dadka aad taageerto iyo sida ay u hadlaan. Xusuusnow in aad dulqaad yeelato, naxariis lahaato oo aad iskudaydo in aad waxyaabaha u qaadan shakhsi ahaan. Waxaad istiraatiijiyadaha wadahadalka oo badan ku baran doontaa tababbarkaaga aasaasiga ah iyo tababbarka gaarka u ah dadka.

Wadahadalka iyadoo Af-xir La Xiran Yahay

Weji-xirada iyo qalabka lagu neefsado waxaa ay wadahadalka ka dhigayaan mid adag, gaar ahaan dadka xoogaa maqalka ku adag. Iskuday istiraatiijiyadahan soo socda si aad wadahadalkaaga uga dhigto mid wax-ku-ool ah.

Ha sameynin...	Samee...
✗ Qaylo.	✓ Tartiibi hadalkaaga oo si cad ugu dhawaaq erey kasta, gaar ahaan dhawaaqyada koowaad iyo kan ugu dambeeya.
✗ Ku celceli isla oraaqda.	✓ Iskuday in aad hadalka ama su'aasha si kale u dhigto oo aad ereyo kale adeegsato.
✗ Iskuday in aad hadasho adiga oo wax kale sameynaya isla-waqtigaa.	✓ Feejignaantaada oo dhan sii qofka kale. Hubso in ay wajigaaga arki karaan oo isticmaal jir ka-hadalkaaga si uu wadahadalka kaaga caawiyo.
✗ Dheh "huh?" ama "waa maxay?" marka aadan fahmin.	✓ Ku celi waxa aadan fahmin oo weyddii kala caddeyn.
✗ Af-xirkaaga iska fur.	✓ Iskuday in aad xirato af-xir leh daaqad/meel daahfuran leh si qofka kale uu afkaaga u arko.
✗ Dulqaadka hadduu kaa dhammaado iska-dhaaf.	✓ Xusuusnow in caqabadaha ay yihiin kuwo dhab ah. Dadaalka dheeraadka ah ee aad bixiso si hadalkaaga uu u noqdo mid cad, wanaagsan, iyo dulqaad leh ayaa wuxuu gacan ka geysan karaa dhisidda xiriir daryeelbixin wanaagsan.


Aragtiyada Figta Koowaad

Waxaad kaliya haysataa dhowr daqiiqo oo aad ku sameyso aragtida figta koowaad oo wanaagsan oo aad la yeelato macaamiisha, xubnaha qoyska, saaxiibada ama mas'uuliyiinta. Aragtiyada koowaad waxaa ay ku saleysan yihiin:

- Ereyada lagu hadlo
- Muuqaalka
- Jir-ka-hadalka
- Habdhaqanka
- Dharka

La kulanka Macmiilka Marka Koowaad

Kahor marka koowaad ee aad macmiilka la kulmayso, dib-u-eegis ku samee qorshahooda daryeelka si aad wax uga oggaato dookhyada iyo baahiyada wadhadalkooda. Qorshee in aad ula hadasho habka sida ugu wanaagsan ugu shaqeynaya. Hubso in aad is-barto iyo in aad sharraxdo sababta aad halkaa u joogto. Sidoo kale macmiilka weyddii magaca ay doorbidayaan in ay adeegsadaan.




Marnaba ma heli doontid fursad labaad oo aad ku sameyso aragtida koowaad oo wanaagsan.

Dhageysi

Dhageysigu wuxuu aasaasi u yahay wadhadalka wanaagsan. Xirfadhaa dhageysiga ee wanaagsan:

- Waxay kaa caawinayaan dhisidda kalsoonida uu macmiilka kugu qabay.
- Wuxuu dhiirrigelinayaa dareen iyo fikrad wadaagista daacadda ah.
- Hubso in aad fahanto waxa uu qofka kale sheegayo.
- Dhageysiga wanaagsani wuxuu u baahan tahay dadaal.



Qofka sii 100% ee feejignaantaada.

Ha isku-dayin in aad wax kale sameyso adiga oo dhageysanaya

Daneyn u muuji qofka: Qofka ku jeeso oo dhankiisa waxyar u janjeero.

Dhageysiga wanaagsan wuxuu macnahiisu yahay in diiradda la saaro qofka kale inta ay arrimahooda ka hadlayaan.

Dulqaad

Macaamiisha qaarkood waxay u baahan karaan waqti dheeraad ah si ay isu sharxaan. Dhageysiga wanaagsan wuxuu sidoo kale macmiilka siinayaa waqti badan oo ku filan hadalkooda. Dhabbetusayaashan raac marka aad macmiilka dhageysanayso.

- Ku dhiirrigeli macmiilka in uu hadalkiisa sii wato adiga oo ku oranaya "Waan arkaa," "Wax kale ii sheeg," "Um-hmm," ama adiga oo madaxaaga ruxaya.
- Haddii aadan fahmin, weyddii su'aalo si aad macluumaad dheeraad ah u hesho. Ha iska dhigin in aad fahmeyso.
- Hadalka haka dhexgalin adiga oo siinaya fikradahaaga ama taladaada. Taa beddelkeeda, diiradda saar dhageysiga si aad u fahamto. Fikradahaaga sii marka ay kaa codsadaan in aad ra'yi ku biiriso.
- Diyaar u ahaaw in aad dhageysato waxa macmiilka uu sheegayo. Ha iska ilaalinin mowduuca sababta oo ah waxay kaa dhigeysaa raaxo la'aan.

Aamusnaan

Mararka qaarkood, waxaa wanaagsan in la aamusnaado iyo in la dhageysto.

- Haddii macmiilka uu murugeysan yahay ama walaacsan yahay, mararka qaarkood dhageysiga oo kaliya ayaa dad caawiya.
- Aamusnaanta waxay qofka siinaysaa waqti uu ku fikiro oo uu ereyado ku doorto.
- Aamusnaanta waxay qofka siinaysaa waqti uu ku xakameeyo xanaaqa iyo dareennada kale ee adag.

Dadka sii waqti ay ku fikiraan oo ay wax ku dareemaan.

Qoraallo Qorasho

Qoraallo qaadashada waxaa ay kaa caawin kartaa in aad xusuusato si aad uga soo baxdo dhammaan baahiyada macmiilka. Haddii aad dooneyso in aad qoraallo qaadata marka aad macmiilka la hadlayso:



- Oggolaanshahooda weyddiiso ka hor inta aadan qoraallada qoran.
- Qofka u sheeg in aad qoraneyso qoraallo isaga ku saabsan, oo tusi ama u sheeg wax aad ka qoreyso.
- Ogow oo raac siyaasadaha loo-shaqeeyahaaga ee ku saabsan qoraallo qorashada.
- Xusuusnow in aad qoraallada u ilaaliso in ay yihiin macluumaad sir ah.
- Qoraallo haku qorin aaladda ama telefoonkaaga gaarka ah.
- Jeex-jeex qoraallada aan rasmiga ahayn dhammaadka kaltankaaga shaqada si aad u ilaaliso asturnaanta iyo sirta macmiilka.

Jir-ka-hadalka

Dhaqdhaqaaqaaga jireed, sida aad jirkaaga u celinayso iyo muuqaalka dareenka wejigaaga laga dheehan karo dhammaan waxaa ay qayb ka yihiin jir-ka-hadalkaaga ama wadahadalka aan hadalka ahayn. Jir-ka-hadalkaaga wuxuu farriimo badan u dirayaa dadka kugu dhow. Marka aad macmiil la joogto, ka fikir waxa uu jir-ka-hadalkaaga uu u sheegayo.

- Hadalka farxadda ka muuqata iyo codka macaan waxay muujinayaan dabecad wanaagsan.
- U jeesadka dhanka qofka waxay muujinaysaa in aad feejignaan u muujinaysyo.
- Qaabka istaaga iyadoo gacmuhu ay debecsan yihiin oo lugahana aysan isdhaafsanayn waxay ku tusinayaan in lagu imaan karo oo aad isku kalsoon tahay.
- Had iyo jeer hubso in jir-ka-hadalkaaga uu waafaqsan yahay waxa aad hadalkaaga ku sheegayso.

Wadahadalka aan hadalka ahayn waa awood badan leh.

Jir-ka-hadalka Macmiilka

Had iyo jeer feejignaan u muuji jir-ka-hadalka macmiilka. Baaqyadooda, dhawaaqa hadalkooda iyo muuqaallada wejigooda waxay wax badan kaaga sheegi karaan dareenkooda.

Tusaale ahaan, kuwan waa qaar ka mid ah astaamaha aan hadalka ahayn ee muujinaya in qofku uu xanuun dareemayo:

- Jir giigsan oo kacsan.
- Hore iyo gadaal isu-ruxid.
- In ay si joogto ah u taabtaan ama u xoqaan meel jirkooda ka mid ah oo xanuun leh.
- Waji-kaduud ama indho ay dhibaato ka muuqato.

Marka loo fiiro yeesho astaamaha aan hadalka ahayn ee xanuunka, waxaad

- Macmiilka kala hadli karaa waxaa aad sameyn karto si aad uga dhigto kuwo raaxo badan dareemaya.
- Si aad ah uga taxaddar marka aad qabanayso hawlaha daryeelka shakhsiyeed.
- Ka digtoonow suuragalnada xaaladaha sii xumaanaya.

Dadka mararka qaarkood waxay raaxo la'aan ku dareemaan ama aysan awoodin in ay xanuunkooda ka hadlaan. Haddii jir-ka-hadalka qofka uu kuu sheego in ay xanuun dareemayaan, weyddii sida uu dareenkoodu yahay. Haddii ay kuu sheegaan in ay wanaagsan yihiin, u sharrax waxa aad aragto. Haddii ay ku adkeystaan in ay fiicnaan dareemayaan, hala murmin. Sii-wad indha-indheynta ka-dib u sheeg walaacyo kasta ee aad qabto macmiilka ama kooxdiiisa daryeelka.



Wadahadalka Xirfadeed

Mid ka mid ah mas'uuliyadahaaga sida shaqaale ahaan waa in aad si xirfadlenimo ah ula hadasho shaqaalaha kula shaqeeya iyo kormeerayaasha. Marka aad ka qabto walaacyo, su'aalo ama dhibaatooyin qof kula shaqeeya, khilaafaadka ka dhasha jadwalkaaga ama arrimaha kale, waxaad u baahan tahay in aad la hadasho kormeerahaaga ama maamulayaasha kale. Wadahadalka xirfadeed ayaa kaa caawin kara in aad si taabogal ah u xalliso arrimahaan.



- **Dib-ha-u-dhigin ama ha qarinin dhibaatooyinka.** Kormeerahaaga sii waqti uu gacan uga geysanayo xallinta arrinta.
- **Noqo qof wanaag muujiya.** Dabecadda wanaagsan waxay caawinaysaa qof walba oo kula shaqeeya, oo uu ka mid yahay loo-shaqeeyahaaga. Ka hadal su'aalaha ama soo-jeedimada intii aad ka hadli lahayd cabashooyin.
- **Weyddii waxa aad u baahan tahay.** Cabasho aan tallaabo laga qaadeynin ma ahan wax taabogal ah. Sharrax xaaladda ama si cad oo ujeeddo leh u codso. Si toos ah u weyddii waxa aad dooneyso ama u baahan tahay.
- **Haka falcelinin; taa beddelkeeda wax-ka-qabo.** Haddii aad wax ka xanaaqdid ama ka carooto, sug ilaa aad ka xameyso dareenkaaga ka hor inta aadan loo-shaqeeyahaaga u tagin.

Si xirfadlenimo ka muuqata ula hadal kormeerahaaga.

Telefoon ku hadalka marka Shaqada la joogo

Ka jawaabidda telefoonka marka shaqada la joogo waxay u baahan tahay akhlaaq shaqo oo wanaagsan.

- Neefsasho qoto-dheer qaado oo diiradda saar wacitaanka.
- Qalin iyo waraaq diyaarso.
- Dhoola-cadee marka aad telefoonka kor-u-qaadeyso. Dhoolaceynta marka aad hadleyso waxay codkaaga ka dhigeysaa mid wanaagsan.
- Adeegso dhawaaq codeed caawimaad leh, dabiici ah oo ixtiraam ka muuqda.
- Haddii aad ka jawaabeyso telefoon ay xarun leedahay, sheeg magaca xarunta/guriga iyo magacaaga oo saddexan. Weyddii, "Maxaan kaa caawiyaa?"
- Haddii qofku uu kaa codsado in aad uga jawaabto telefoonkiisa shakhsiyeed*, sheeg cidda aad tahay iyo cidda iska leh telefoonka aad ka jawaabeyso. Tusaale ahaan, dheh "Halow, waa Faadumo. Waxaan telefoonka ka jawaabayaa aniga oo ku hadlaya magaca Susan Cortez. Maxaan kaa caawiyaa?"

*Qofka telefoonkiisa ha ugu jawaabin haddii qofka uu ku faro in aad telefoonka uga jawaabto mooyaane.

Diiwaangelinta iyo Ka Soo Warbixinta

Feejignaan dhow u yeelo wanaagga iyo caafimaadka macmiilka. Waxaad mas'uul ka tahay in aad kala hadasho isbeddelo ama walaacyo kasta dhammaan xubnaha kooxda daryeelka ee lagama maarmaanka ah. Wadahadalkan waa muhiim marka xubnaha kooxda daryeelka ay shaqeeyaan xilliyo kala duwan ama ay ka shaqeeyaan waaxo kala duwan.



Indha-indhee

Shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ahaan, waxaad noqon kartaa qofkii ugu horreeyay ee oggaada isbeddelka ku yimaada xaaladda jirka, dhimirka ama dareenka ee macmiilka. Waa mas'uuliyad adiga ku saaran in aad eegto isbeddeladan iyo in aad u soo sheegto kooxda daryeelka.

Isticmaal dareenadaada in aad taabato, aragto, uriso oo aad maqasho in aad macmiilka ka eegto isbeddelo marka aad daryeelayso. Tusaalooyinka qaarkood waxaa ka mid ah:

- Isbeddellada niyadda qofka hadba sida ay tahay, sida aamusnaanta aan caadiga ahayn, ilmaynta, xanaaqsanaan, cabsi, murugo, shaki iyo tuhun (dhahidda qof in uu u imaanayo) ama ka hadalka in ay waxyeello isu geysanayaan (is-dilid).
- Macmiilka wuxuu kuu sheegayaa in uu xanuun dareemo.
- Isbeddellada isqurxinta, sida dhar wasakh ah, timo wasakh ah iyo/ama ur jireed.

- Isbeddelada garashada waxaa ka mid ah jahwareer cusub ama sii xumaanaa, ilaawid, iskaashi la'aan ama jawaab ka bixinta su'aalaha aan caqligalka ahayn.
- Isbeddel kasta ee ku yimaada awoodda socodka, istaaga ama sameynta is-daryeelka maalinlaha ah.
- Isbeddellada jirka ee la macno noqon kara jirro ama caabuq, sida bararka, finanka maqaarka ka soo baxa, xanuun, qufac ama neefsiga oo qofka dhib ku noqda.
- Isbeddelka dabeecadaha cunista, cabbista ama wax-karinta, miisaanka jirka oo hoos u dhaca, xiisayn la'aanta cuntada iyo cunista ama astaan kasta ee muujinaysa in aan in ku filan la cunin ama la cabbin.
- Isbeddelada baahiyada musqulaha.
- Weyddiisashada caawimaadda dhibaato sababtey kurbo.

Ka eeg astaamaha isbeddelka marka aad daryeelayso.



Diiwaangelinta

Xusuusnow: Diiwaannada macmiilka waxaa ku jira macluumaad shakhsiyeed iyo kuwo sir ah. Sharciyada gobolka iyo federaalka waxaa ay muujinayaan dhabbetusalaay adag oo loogu talagalay sida ay tahay in aad ula tacaamusho diiwaannada macmiilka, gaar ahaan diiwaannada caafimaadka.

Had iyo jeer raac siyaasadda shirkadaada ama xaruntaada ee ku saabsan la-tacaamulka ama wax ku-darridda diiwaannada macmiilka. Waxaanna ka mid ah sida, goorta iyo waxa la sameeyo marka macluumaad la qorayo.

Fahamka iyo raacidda habraacyada iyo siyaasadaha diiwaangelinta halka aad ka shaqeyso.

Marka aad diiwaangelinayso macluumaad ku saabsan macmiil, kuddar xaqiiqooyinka oo dhan.

GOORTA...	...taariikhda iyo waqtiga aad aragtey isbeddelka, hab-dhaqanka ama dhacdada.	12:45 pm 11ka Luulyo, 2023
WAA MAXAY...	...dhacey - qor xaqiiqooyinka dhabta ah.	Mrs. Singh waxaa ay ku dhibtootey in qadadeeda ay cunto. Waxaa ay dhibaato ku qabtaa in ay rooti ruugto. Waxaa ay ka cabatey in uu afka xanuunayo.
HALKEE...	...ku aragtey iyadoo ay tani dhaceyso.	Dhacdadan waxaa ay ka dhacdey qolka qadada.
INTEE...	...in le'eg iyo intee jeer ayay dhacdey.	Waa markii ugu horreysay ee aan arkay.
YAA...	...joogey, ku lug lahaa ama la ogeysiiyay waxa dhacayay.	Waxaan u sheegay kormeeraheyga waxaanna weyddiistay talo.
WAA MAXAY...	...tallaabada aad qaadey iyo natiijadii ka soo baxday.	Waxaan Marwo Singh siinay boorash. Waxay awoodey in ay si raaxo leh u cunto, laakiinse waxaa ay sheegtay in ay jeclaan lahayn in ay cuni karto saandwiiij. Waxaa ballan looga sameeyay dhakhtarka ilkaha.

Talooyinka Guud Ee Diiwaangelinta

- Sharrax kaliya waxa aad aragto, maqasho, dareento iyo/ama uriso. Kuwani waa xaqiiqooyinka dhabta ah. Haku darrin fikradahaaga shakhsiyeed iyo fasiraado waxa aad u maleyso in ay dhaceen.
- Ka fogaaw ku magacaabidda ama in aad xukmiso dadka.
- Had iyo jeer ilaali xaqa uu macmiilka u leeyahay in sirtiisa la dhowro. Marnaba ha uga tagin qoraallada ama foomamka meelo ay dadka kale ka arki karaan.

- Haddii aad ku diiwaangelinayso waraaq, si cad u qor si ay dadka kale ugu fududaato in ay qoraalkaaga akhriyaan. Isticmaal khad madow ama buluug ah marka aad diiwaangelinayso.
- Si cad u sharrax waxa aad aragto sidaa daraaddeed qofka aan meesha joogin ayaa si fudud u fahmaya.
- Marnaba wax haku qorin diiwaanka macmiilka wax ay ahayd in uu ku qoro qof kula shaqeeya ama ha saxiixin diiwaanka wax aadan sameyn ama arkin iyagoo dhacaya.
- Xusuusnow in waxa aad qorayso in uu noqonayo dukumenti sharci ah.

Diiwaangeli xaqiiqda, ee aan ahayn fikradahaaga.

Ka-warbixinta khasabka ah

Nasiib-darro, dadka hela daryeelka muddada-dheer waxay halis badan ugu jiraan xadgudub, dayac, ka dayrin iyo dhiigmiirasho maaliyadeed. Haddii aad aragto astaamaha ama tuhunto in qof qaangaar ah oo nugul la waxyeellaynayo, waa in aad warbixin u gudbisoo mas'uuliyiinta gobolka Washington iyo laanta sharci-fulinta. Waa run xitaa haddii aadan shaqada joogin ([RCW 74.34.035](#)).

Sharciga gobolka Washington ayaa sidoo kale kaaga baahan, sida ka soo warbixin ku khasban ahaan, in aad soo sheegto xadgudubka iyo dayaca carruurta ee laga shakiyo ([RCW 26.44.030](#)).

Loo-shaqeeyahaaga wuxuu sidoo kale yeellan doonaa xeerar qoran iyo tababar ku saabsan ka ilaalinta dadka waaweyn ee nugul waxyeellada iyo soo sheegidda xadgudubka, dayaca, ka dayrinta iyo dhiigmiirasho maaliyadeed.

Sida shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ee gobolka Washington ahaan, waxaa sharci ahaan lagaaga baahan yahay in aad waaxda u soo sheegto xadgudubka, dayaca, ka-dayrinta iyo dhiigmiirasho maaliyadeed ee la tuhunsan yahay ee dadka waaweyn.

Waa kuma qofka weyn ee nugul?

Shaqaalaha daryeelka muddada dheer ahaan, macmiil kasta ee aad daryeesho waa qof weyn oo nugul. [RCW 73.34.020](#) wuxuu qofka weyn ee nugul ku qeexayaa in uu yahay qof:

- Ay da'diisu ka weyn tahay 60 sano jir ee aan awoodin in uu isdaryeelo, mise
- Ku nool rugaha lagu xannaaneeyo dadka waaweyn, xarunta xannaaneynta waayeelka iyo naafada, guriga qoyska qaangaarka ah, xarunta adeegyada la wanaajiyey ama goob kale oo ay shati u siisay ama aqoonsatey Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimwaadka, ama
- Adeegyo ka helaya caafimaadka guriga, guriga lagu xannaaneeyo bukaanka, hay'ad bixisa daryeelka guriga ama adeeg-bixiye shakhsi ah, ama
- Leh naafonimo koritaan, ama
- Leh mas'uul sharci ah ama ilaaliye, ama
- Isaga haga daryeelkiisa oo adeegyo ka hela kaaliye shakhsiyeed si waafaqsan [cutubka 74.39 RCW](#).

Qeexid

Kuwani waa qeexid sharciyeed. Qeexiddii ugu dambaysay, ka eeg [RCW 74.34.020](#). Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan qeexiddan, kormeerahaaga weyddii.

- **Ka-dayrin** waxaa loola jeedaa ficilka ama ficil la'aanta qofka ama hay'adda waajibaadka ka saaran in ay daryeesho qofka weyn ee nugul oo uga tageysa qofka la'aanta habab ama awoodo uu ku helayo daryeelka caafimaadka, hoyga, dharka, ama cuntada lagama maarmaanka ah.
- **Xadgudub** waxaa loola jeeda ficilka, ficil la'aanta ula-kaca ah ama feejignaan la'aanta ku yimaada ee u geysaneysa dhaawac, xirid aan macquul ahayn, cabsigelin, ama ciqaab qof weyn oo nugul. Xaaladaha xadgudub lagula kaco qofka weyn ee nugul ee aanan awoodin in uu soo bandhigo ama sheego waxyeello jireed, xanuun, ama xanuun dhimir, xadgudubka waxaa loo qaadanaya in uu keeno waxyeello jireed, xanuun, ama xanuun dhumir. Xadgudubka waxaa ka mid ah xadgudub galmo, xadgudub dhimir, xadgudub jireed, iyo dhiigmiirashada shakhsiyeed ee qofka weyn ee nugul, iyo isticmaalka aanan habboonayn ee juujuubka ka dhan ah qofka weyn ee nugul.

- **Xadgudub galmo** waxaa loola jeedaa nooc kasta oo ah hab-dhaqan galmo oo aanan raalli laga ahayn, oo ay ku jiraan balse aan ku koobnayn taabashada aanan la rabin ama aanan habboonayn, kufsi, fara-xumeyn, galmo aan loo baahnayn, galmo khasab ah, ka qaadista sawirro qaawan ama fiidiyow ka duubis, daawashada qofka oo qaawan ama galmoonaya, in qofka meel fagaare ah lagu qaawiyo iyo dhibaateyn galmo. Xadgudub galmo waxaa sidoo kale ka mid ah hab-dhaqan galmo kasta ee uu la sameeyo qof hawl-wadeennada ka mid ah, oo aan sidoo kale ahayn qof xarunta deggan ama macmiil ka ah, xarunta ama qof ka mid ah hawl-wadeennada barnaamij la oggol yahay sida ku cad cutubka 71A.12 RCW, iyo qof weyn oo nugul oo ku nool xaruntaasi ama ka qaadanaya adeeg barnaamij la oggol yahay sida ku cad cutubka 71A.12 RCW, haddii uu yahay mid wada oggol ah iyo haddii kaleba.
- **Xadgudub jireed** waxaa loola jeedaa falka ula-kaca ah ama falka feejignaan la'aanta ku dhaca ee lagu geysanayo dhaawac jireed ama dabanbaabyo jireed. Xadgudub jireed waxaa ka mid ah, balse aanan ku xaddidnayn, dhufashada ama ku dhufashada shey, dharbaaxid, qanjaruufyo, cayjin, laadid, riixid, ama juqayn.
- **Xadgudub dhimir ama maskaxeed** waxaa loola jeedaa falka ula-kaca ah ama falka hadalka ama aan hadalka ahayn ee feejignaan la'aanta ku yimaada ee loogu hanjabayo, lagu bahdilayo ama lagu liidayo, lagu dhibaateynayo, lagu khasbayo, lagu faquuqayo, si aan macquul ahayn loogu xirayo, ama lagu ciqaabayo qofka weyn ee nugul. Xadgudubka dhimirka waxaa ka mid noqon karan ku qosolka, ku qaylinta, ama u dhaarashada.
- **Dhiigmiirasho Shakhsiyeed** waxaa loola jeedaa falka ku khasbidda, ku waajibinta, ama ku dirqinta saameynta aan loo baahnayn qofka weyn ee nugul taas oo keenaysa qofka weyn ee nugul in uu u dhaqmo hab aanan waafaqsaneyn hab-dhaqanka hore ama keenaysa qofka weyn ee nugul in uu qabto adeegyo faa'iido ugu jira qof kale.
- **Isticmaalka aan habboonayn ee juujuubka** waxaa loola jeedaa isticmaalka aan habboonayn ee xannibidda kiimiko, jireed ama makaanik ee loogu talagalay ku habboonaanta ama anshax-marinta ama habka: (i) Aan waafaqsanayn shuruudaha shahaaddo bixinta ama shati-bixinta federaalka ama gobolka ee xarumaha, isbitaallada ama barnaamijyada loo oggolaadey si waafaqsan cutubka 71A.12 RCW; (ii) aan caafimaad ahaan la oggolaan; ama (iii) sida kale ah xadgudub waafaqsan qaybtan.
- **Dhiigmiirasho maaliyadeed** waxaa loola jeedaa isticmaalka sharci-darrada ah ama aan habboonayn, xakameynta ama haynta hantida, dakhliga, kheyraadka ama maaliyadaha amaanada ah ee qofka weyn ee nugul ee uu sameeyo qof ama hay'ad kasta ama faa'iidada qof ama hay'ad kasta ee aan ahayn tan loogu talagalay faa'iidada qofka weyn ee nugul.
- **Dayac** waxaa loola jeedaa hab-dhaqanka ama tallaabo-qaadis la'aanta qofka ama hay'adda waajibaadka daryeel uu ka saaran yahay qofka taas oo ku guuldareysatey bixinta alaabooyinka iyo adeegyada joogteeya caafimaadka jirka ama dhimirka ee qofka weyn ee nugul, ama ku guuldareysata ka fogaanshaha ama ka hortagga waxyeello jireed ama dhimir ama xanuunka qofka weyn ee nugul; ama (b) ficilka ama ka tagidda qofka ama hay'adda waajibaadka daryeel uu ka saaran yahay oo muujinaysa tixgelin la'aanta dhabta ah ee cawaaqib-xumada sidaa u weyn ee noqoneysa khatar cad oo ku wajahan caafimaadka, wanaagga ama bedqabka qofka weyn ee nugul, oo ay ku jiraan habdhaqanka xaddidan ee mamnuuca ah iyadoo la raacayo RCW 9A.42.100.

Weyddii tababarahaaga, loo-shaqeeyahaaga, ama kormeeraha haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan qeexiddan.

Wax badan oo ku saabsan Xadgudubka dhimirka

In qof loogu yeero magacyo, ama in lagu eedeeyo in uu yahay waswaaslow, feejignaan raadin, ama in uu falcelin badan bixiyo waxaa ay u keeni kartaa waxyeello. Hanjbaadaha waxaa ka mid ah u digidda sida "haddii aadan sameyn waxa aan kuu sheego, daryeel kuma siin doono."

Xusuusnow in yoolkaaga uu yahay in aad qofka u taageerto habka sida wanaagsan ugu shaqeynaya. Ixtiraam isu-qareemeyntooda, danahooda, iyo dookhyadooda gaarka ah. U wadahadla oo u wada shaqeyna koox ahaan si aad uga fogaato khilaadka oo aad dhibaatooyinka u xalliso.

Is-dayacid

Waxaa jira xoogaa xaalado ah halkaasi oo qofka weyn ee nugul ee aan xarunta ku noolayn uu dayaci karo baahiyadooda, waxaanna laga yaabaa in ay curyaaminayso ama halis-gelinayso caafimaadkooda dhimirka iyo/ama jireed. Tusaalooyinka is-dayaciddda waxaa ka mid noqon kara awoodid la'aanta maareynta maaliyadaha, in aan guriga oolin wax cunto ah ama naadaafad xumo keenaysa jir xanuun ama jir ur.

Sharcigu uma baahna ka soo-warbixiyayaal ku khasban, sida shaqaalaha daryeelka muddada-dheer, oo soo sheegaya is-dayaciddda. Haddii aad qabto walaacyo ku saabsan in qof uu is-dayacay, warbixin ayaad ka diyaarin kartaa. Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ka-warbixinta khasabka ah iyo is-dayaciddda, booqo dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/mandatory-and-permissive-reporters.

Haddii qofka aad taageerto uu muujiyo calaamadaha is-dayaciddda, waxaa laga yaabaa in uu qofkaasi leeyahay baahiyo daryeel oo aan laga haqabtirin. Kala hadal walaacyadaada. Diiwaangeli waxa uu kuu sheego ka-dibna ku wargeli kormeerahaaga ama maamulka kiiska macmiilka.

Haddii qofku uusan ahayn macmiila aad taageerto, waxaa laga yaabaa in aaney caddeyn in ay tahay is-dayacid ama haddii uu qof kale dayacayo. Haseyeeshee, mas'uuliyadaada ma ahan in aad xaaladda xukmiso. Haddii aad hayso wax sabab ah oo lagu aamini karo in qofka weyn ee nugul in uu wajahayo xadgudub, dayac, ka-dayrin ama dhiigmiirasho maaliyadeed, waa in aad warbixin ka soo gudbisaa.

Isticmaalka Juujuubka

Jujuubinta macmiilka **KAMA** dhigeysa mid bedqaba. Jujuubinta ama xannibidda waa khatar waxayna sababeysaa waxyeello jireed iyo mid dareen. Ku dhowaad xaaladaha dhammaantooda, jujuub lagu ma adeegsan karo. Jujuubidda marnaba looma adeegsan karo in lagu edbiyo macmiil ama ku habboonaanta hawlwadeennada. Waxaa jira saddex nooc oo jujuubin ah (loogu talagalay qeexidooda sharci, (eeg [RCW 74.34.020](https://rcw.wa.gov/74.34.020)):



Jujuub jireed waxaa loola jeedaa isticmaalka xoog jireed iyadoo aan la adeegsan wax aalado ah, oo loogu talagalay ujeeddo jujuubin/xannibidda dhaqdhaqaaqa xorka ah ee jirka qaangaarka nugul. Tusaalooyinka jujuubinta jireed waxaa ka mid ah in qofka dhulka lagu celiyo ama in dhab la siiyo si uusan u dhaqdhaqaaqin.



Jujuub makaanik waxaa ka mid ah aalad kasta oo lagu xiro ama loo dhoweeyo jirka macmiilka oo aan si fudud uusan isaga saari karin macmiilka oo xaddidaysa xorriyadda dhaqdhaqaaqa ama gaarista caadiga ah ee jirkiisa. Jujuubka makaanik waxaa ka mid noqon kara suumanka, qoor-xirka, dharka ka hor istaagaya macmiilka in uu gaaro qaybaha jirkiisa, sariir ama kursi uusan qofka ka kici karin.



Jujuub kiimiko waa isticmaalka aan habboonayn ee daroogada lagu xakameeyo qofka niyadiisa, xaaladda dhimirkiisa ama hab-dhaqankiisa oo aan daaweynin xaalado caafimaad. Daawo ama maado kasta waxaa ay noqon karaan jujuub kiimiko haddii loo adeegsado si ku habboon hawlwadeennada ama iyadoo aan jirin korjoogteyn ku filan ama habboon.



Cidlaynta/gooniyeynta khasabka ah sharci ahaan ma ahan nooc jujuub ah, laakiinse wuxuu qofka ka hor-istaagayaa in uu si xor u dhaqdhaqaaqo. Albaabo xiran ama caqabado qofka u xanniba meel gaar ah isaga oo aan raalli ka ahayn (sida qol xiran ama sariir qofka lagu xiro) waa tusaalooyinka xadgudub dhimir.

Jujuubku wuxuu geystaa waxyeello dareen iyo mid jireed iyo xitaa dhimasho.

Warbixin Diyaarinta

Waa **in aad si degdeg ah ugu wargelisaa** Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka haddii aad hayso sabab lagu aamini karo in macmiil ama qof qaangaar ah oo nugal in lagu xadgudbay, la dayacay, laga deyray ama dhiigmiirasho lagu sameeyay. Uma baahnid in aad fasax ka hesho kormeerahaaga ama loo-shaqeeyahaaga si aad warbixin u gudbisno. Cidna kaama joojin karto in aad warbixin diyaariso.

Haddii aad tuhunto weerar jireed ama galmo, waa in aad sidoo kale warbixin u gudbisaa sharci fulinta. Waa in aad sidoo kale warbixinta u gudbisaa qofka baara sababta dhimashada iyo sharci fulinta haddii aad tuhunto dhimasho ka dhalatey xadgudub, dayac ama ka dayrin.

**Qaad tallaabooyin macmiilka looga ilaalinayo waxyeello dheeraad ah.
Haddii macmiilka uu khatar degdeg ah ku jiro, wac 911.**

Sida loo Soo Sheego

Sida loo soo sheego waxaa ay ku xiran tahay halka uu qofku ku nool yahay. Waxaad warbixinta ka sameyn kartaa barta internet-ka ama telefoonka.

Haddii qofku uu ku nool yahay xarun degaan ah (sida rugaha lagu xannaaneeyo dadka waaweyn, guriga qoyska qaangaarka ah, xarunta xannaaneynta waayeelka iyo naafada, xarunta adeegyada la wanaajiyey, daryeelka dhexe ee loogu talagalay shakhsiyadka caqliga naafada ka ah) ama qaadanaya adeegyada taageerada nololeed:

Qaybta Xallinta Cabashooyinka (CRU): 1-800-562-6078
(RTT: 1-800-737-7931)

Barta internet-ka: dshs.wa.gov/altsa/residential-care-services/residential-care-services-online-incident-reporting

Haddii qofka uusan ku noolayn xarun degaan ah:

Khadka Tooska ah ee ENDHARM ee DSHS: 1-866-ENDHARM (1-866-363-4276)
(RTT: 1-800-624-6186)

Adeegyada Ilaalinta Dadka Waaweyn: 1-877-734-6277
(RTT: 1-833-866-5595)

Barta internet-ka: dshs.wa.gov/altsa/reportadultabuse

Ka gaabinta in laga soo warbixiyo sida ka-warbixiye ku waajibta ahaan waa dembi fudud oo guud oo qofka lagu xukumi karo xabsi ilaa 364 maalmood ah iyo qanaax dhan \$5,000.

Warbixinnada baaritaanka iyo kormeerka waxaa si guud looga heli karaa fortress.wa.gov/dshs/adsaapps/lookup/AFHPubLookup.aspx.

La-shaqeynta Kormeerahaaga iyo Ka Soo Warbixinta

Sharcigu wuxuu u baahan yahay loo-shaqeeyahaaga in uu hubiyo in aad soo sheegto ka dayrinta laga shakiyay, xadgudubka, dhiigmiirashada, dhiigmiirasho maaliyadeed ama dayaca:

- Guryaha Qoyska Qaangaarka ah: [WAC 388-76-10673](tel:388-76-10673)
- Xarumaha Xannaaneynta Waayeelka iyo Naafada: [WAC 388-78A-2630](tel:388-78A-2630)
- Xarunta Adeegyada La Wanaajiyey: [WAC 388-107-0590](tel:388-107-0590)
- Hay'adaha Daryeelka Guriga: [WAC 246-335-425](tel:246-335-425)

Uma baahnid in aad fasax ka hesho kormeerahaaga si aad u warbixin rasmi ah ugu gudbiso Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka ama sharci fulinta. Xusuusnow, u digidda

kormeerahaaga kaama fasaxayso mas'uuliyadahaaga sida ka-warbixiye waajib ka saaran ahaan. Waa in aad shakhsi ahaan sameysaa warbixin rasmi ah.

Loo-shaqeeyahaaga waxaa laga yaabaa in uu leeyahay siyaasado iyo habraacyo dheeraad ah. Baro oo raac siyaasadaha loo-shaqeeyahaaga ka sokow in aad sharciga raacdo.

Diiwaannada Dhacdada

Guryaha qoyska qaangaarka ah waa in ay leeyihiin diiwaanka shilka oo ay ku diiwaangelinayaan kuwan soo socda:

- Eedaynta ama tuhunka dhacdooyinka xadgudubka, ka-dayrinta, dayaca ama dhiigmiirashada.
- Shilalka, dhaawacyada ama dhacdooyinka saameynaya wanaagga macmiilka.

Waa mas'uuliyadaada in aad oggaato halka uu yaallo diiwaanka dhacda iyo sida loo buuxiyo.

Baaritaannada

Xarumaha xannaaneynta waayeelka iyo naafada, diiwaannada dhacdada looma baahna. Haseyeeshee, Xarumaha xannaaneynta waayeelka iyo naafada waa in ay diiwaangeliyaan baaritaannada eedayn ama xadgudub kasta oo la tuhunsan yahay, dayrinta, dayaca, dhiigmiirashada, shilka ama dhacdada khatarta-gelin ama saameynaysa caafimaadka ama noloshu macmiilka. Waa mas'uuliyadaada in aad oggaato waxa ay tahay in aad sameyso oo aad diiwaangeliso haddii aad ka shaqeyso xarunta xannaaneynta waayeelka iyo naafada.

Wax Badan oo ay Tahay In Laga Oggaado Ka-warbixinta

Waxaa laga yaabaa in aad dareento xanaaq ama hubid la'aan ku saabsan ka warbixinta. Kuwani waa dareenada caadiga ah. Ha u oggolaan dareennadan in ay kaa joojiyaan in aad ka warbixiso. Waa in aad ka soo warbixisaa/soo sheegtaa. Waa mas'uuliyadaada sida ka warbixiyaha uu waajibka ka saaran yahay ee gobolka Washington.

100% ma hubin in uu xadgudubka dhacayo.	Adiga caddeyn uma baahnid si aad u soo wacdo.
Kormeerahaaga ama macmiilka ayaa iga codsadey in aanan soo wacin.	Adiga fasax ugama baahnid kormeeraha ama macmiilka si aad u soo wacdo. Waa in aad ka soo warbixisaa!
Qof kale ayaa durba soo sheegay.	Adiga waxaa weli lagaaga baahan yahay in aad ka soo warbixiso xitaa haddii uu qof kale soo sheegayo.
Waxaan ka walaacsanahay in aad dhibaato ku dhaco.	Haddii aad uga soo warbixiso si niyadsami ku jirta haddana ay dhacdo in uusan xadgudub jirin, laguma eedayn karo, dhibaataanna lama kulmeysid.
Ma doonayo qof in uu oggaado in aad soo wacay.	Magacaaga waxaa laga dhigi doonaa mid sir ah haddii uu jiro nidaam sharci ah mooyaane.

Is-Daryeelka loogu talagalay Daryeelayaasha

Daryeel-bixintu waa shaqo abaalmarin leh, laakiinse waxay sidoo kale noqon kartaa mid jir ahaan iyo dareen ahaanba adag. Daryeelaha aan naftiisa daryeelin wuxuu daal iyo dhacsaal kala kulmi karaa walbahaarka ka dhasha daryeelbixinta. Tani waxay horseedi kartaa shaqo ku qanacsanaanta shaqada oo yar iyo hoos u dhaca tayada daryeelka ee macmiilka.

Calaamadaha Walbahaarka


Calaamadaha walbahaarka waxay noqon karaan kuwo jireed iyo kuwa dareen. Qaar ka mid ah caalamadaha jireed waxaa ay yeellan karaan dareen jiro, sida hurdada oo kugu adag, calool-xanuun, madax-xanuun ama hargab iyo caabuuq soo noqnoqda. Astamaha kale ee walbahaarka waxaa ka mid ah dhacsaal, walaac, welwel, xanaaq, niyadjab iyo murugo. Astamahaan waxaa ay saameyn karaan tayada noloshaada iyo sidoo kale xiriirradaada shakhsiyeed iyo kuwa xirfadeed. Haddii aad dareenadan iska dareento, ka fikir waxa aad sameynayso si aad naftaada isu daryeesho.

Ku Dhaqanka Is-Daryeelka

Is-daryeelka wanaagsan waxaa ka mid ah:

- **Helidda hurdo kugu filan.** Dadka waaweyn intooda badani waxay u baahan yihiin sideed saacadood oo hurdo ah habeen kasta.
- **Cabbidda biyo kugu filan.** Dadka caafimaadqaba intooda badan waxay u baahan yihiin in u dhaxeysa sagaal iyo 13 koob oo biyo ah maalin kasta.
- **Sameynta doorashooyin wax cunis caafimaadqab leh.** Cunista miro iyo khudaar badan iyo sonkor, cusbo, cuntooyinka la warshadeeyay iyo dufannada aan caafimaadka lahayn oo yar ayaa ka caawin kara jirkaaga in uu xoog yeesho oo uu awoodo in uu si wanaagsan uga jawaabo xaaladaha walbahaarka leh.
- **In jir ahaan la firfircoonaado.** 150 daqiiqo toddobaadkii oo dhaqdhaqaaq xooggiisu dhexdhexaad yahay ah sida socodka oo kale wuxuu saaweyn wanaagsan ku yeelanayaa caafimaadkaaga iyo wanaagaaga.
- **Dhiirrigelinta isku-dheellitirnaanta shaqada/nolosha guriga.** Waa ay adkaan kartaa in la kala saaro shaqada, hawlaha maalinlaha ah, shaqooyinka, iyo maareynta nolosha. Iskuday in aadan qaadin mas'uuliyado dheeraad ah oo ka baxsan xadadkaaga ee shaqada iyo guriga. Nasashooyin joogto ah qaado marka aad awoodo maalintaada shaqada oo dhan.

- **Ku raaxaysiga hiwaayadaha iyo hawlaha kale.** Waqti ku qaadashada sameynta hawlaha aad ku raaxaysato ayaa dhiirrigelin kara dareenno wanaagsan waxayna yareyn karaan walbahaarka. Xitaa waxyaabaha yaryar sida dhageysiga muusiga ayaa ku caawin kara.
- **La-hadalka dadka kale.** Dad la hadalka wuxuu kaa caawin karaa in aad ka shaqeyso xaaladaha iyo dareennada adag. Hel dad taageero leh oo aad ammaan ku dareento oo aad la xiriirto madka aad dareemayso walbahaar ama daal. Kormeerahaaga, daryeelayaasha kale, saaxiib ama qof qoyskaaga ka tirsan ama qareen ama daaweeye ayaa dhammaan awooda in ay ku dhageystaan oo ay ku caawiyaan.
- **Nasasho.** Farsamooyinka nasashada ula-kaca ah sida neefsasho qoto-dheer, khilaawada iyo iskala-bixinta ayaa sidoo kale gacan ka geysan kara yareynta walbahaarka.
- **Ciyaarid.** Hel siyaabo aad si maalin ah uga qaybqaadato ciyaar farxad leh, hal-abuur leh oo aan qorsheysnayn. Ciyaartu waxay jirka siisaa kiimikooyin wanaagsan oo ka qaada walbahaarka waxayna taageeraan wanaagga iyo caafimaadka shakhsiyeed.
- **Ku faanidda shaqadaada.** Waxaad isbeddel wanaagsan oo qotodheer ku yeelanaysaa nolosha dadka aad daryeesho. Waa shaqo wanaagsan, oo waa in aad wanaag ka dareentaa.



Dhibaatooyinka Goobta Shaqada

Waxaad xaq u leedahay in aadan goobta shaqada kala kulmid takoor, dhibaateyn iyo xadgudub.

La-tacaalidda Dhaqanxumada marka aad Daryeelka Ku Bixinayso Xarunta Degaanka ah

Haddii macmiil ama saaxiib shaqo uu kaa dhigo in aad dareento takoor, dhibaateyn ama xadgudub, kala hadal kormeerahaama ama cidda aad u shaqeyso.

La-tacaalidda Dhaqanxumada marka aad Daryeelka Ku Bixinayso Guri Shakhsiyeed

Iskuday waxyaabahan soo socda haddii aad dareemeyso raaxo la'aan ama ammaan la'aan, ama aad dareemeyso dhibaateyn, xadgudub ama takoor adiga oo macmiilka kula shaqeynaya gurigiisa ama abaarmankiisa.

Heerka 1aad

Adiga **aad ku dareento raaxo la'aan** habdhaqanka macmiilka ama qofka kale oo guriga jooga, laakiinse **aadan dareemin in ammaankaagu uu halis ku jiro.**

- Haddii aad raaxo la'aan ku dareento in aad sidaa sameyso, macmiilka weyddii in uu hab-dhaqanka joojiyo ka-dibna u sharrax in aad raaxo la'aan dareemeyso.
- Dib-u-akhri qorshaha adeegga macmiilka si aad u aragto haddii ay jiraan qoraallo, istiraatiijiyado wadahal, ama waxqabadyo ku caawiya oo ku taageera. Xusuunow in habdhaqanka intiisa badan uu baahi muujiyo. Kala-xiriir kormeerahaaga ama loo-shaqeeyahaaga cusboonaysiin kasta ee uu qorshaha adeegga u baahan yahay.
- La-xiriir kormeerahaaga ama loo-shaqeeyahaaga si aad ugu hesho soo-jeedimo ama si aad u sheegto hab-dhaqanka cusub ee kaa dhigaya in aad dareento raaxo la'aan.

Heerka 2aad

Waxaad **ammaan la'aan ku dareentaa** habdhaqanka macmiilka ama qof kale oo guriga jooga, **laakiin ma dooneyso ama uma baahnid in aad si degdeg ah xaaladda uga tagtid.**

- La xiriir kormeerahaaga ama loo-shaqeeyahaaga oo u sheeg hab-dhaqannada kuu keenaya in aad ammaan la'aan ku dareento. Bixi faahfaahinnada ka caawinaya in ay xaaladdu fahmaan.
- Tixgeli in aad hesho tababar gaar ah oo kaa caawinaya in aad si fiican u fahamto baahiyada hab-dhaqanka ee macmiilka. Si aad wax badan uga oggaato ikhtiyarada tababarka, la xiriir kormeerahaaga ama loo-shaqeeyahaaga.
- La xiriir kormeerahaaga ama loo-shaqeeyahaaga haddii aadan dooneynin in aad daryeel u fidiso macmiilka.

Heerka 3aad

Waxaad **ammaan la'aan ku dareentaa** hab-dhaqanka macmiilka ama qof kale oo guriga jooga waxaadna **dooneysaa ama u baahan tahay in aad si degdeg ah uga tagto xaaladda.**

- Guriga isaga tag, oo islamarkiiba wac kormeerahaaga ama loo-shaqeeyahaaga si aad u oggeysiiso in aad baxdey una sharrax walaacyadaada ku saabsan xaaladda. Haddii ay jiraan walaacyo ku saabsan in macmiilka uu kaligiisa yahay oo aadanna awoodin in aad kormeerahaaga ama loo-shaqeeyahaaga la xiriirto, iskuday in aad la xiriirto kormeere kale ama xubin kale oo ka tirsan shaqaalaha Hay'adda Degaanka ee Gaboobidda/DSHS. Haddii in macmiilka kaligiisa laga tago ay halis degdeg ah gelayso, wac 911.
 - Dib-u-eeg dhammaan waxqabadyada lagu qorey heerarka 1aad iyo 2aad.
 - La xiriir kormeerahaaga ama loo-shaqeeyahaaga haddii aadan dooneynin in aad daryeel u fidiso macmiilka.
-

Shuruudahaaga Dheeraadka ah ee Tababbarka iyo Shahaaddo-qaadashada



Shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ee u shaqeeya guryaha qoyska qaangaarka ah, xarumaha xannaaneynta waayeelka iyo naafada, xarumaha adeegyada la wanaajiyay iyo hay'adaha daryeelka guriga waa in ay noqdaan Kaaliyayaasha Daryeelka Guriga ee la aqoonsan yahay iyadoo loo marayo Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington. Loo-shaqeeyahaaga waa in uu kaa caawiyaa hannaankan.

Si loo helo sharraaxadda faahfaahsan ee hannaankan, booqo dshs.wa.gov/altsa/training/training-requirements-classes-quick-links.

Soo-gudbinta iyo Codsiga

14 maalmood gudahooda ka-dib shaqaaleynta, codsiga Kaaliyaha Daryeelka Guriga u gudbi Waaxda Caafimaadka. Waxaad codsiga ku sameyn kartaa warqad ama barta internet-ka doh.wa.gov/licenses-permits-and-certificates/professions-new-renew-or-update/home-care-aide/licensing-information.

Hannaanka codsiga waxaa ku jira ujuurrooyin iyo hubinta raadraaca oo fara-qaad ku saleysan.

Shuruudaha Tababbarka

Tababbarkan hanuuninta waa labada saacadood ee ugu horreeya ee tababbarka lagaaga baahan yahay. Waa in aad sidoo kale dhammeysato tababbarka bedqabka saddexda-saaca ah ka hor inta aadan macmiisha la shaqeyn. Waa in aad dhammaan 75 saacadood ee tababbarka Kaaliyaha Daryeelka Guriga ku dhammeysataa 120 maalmood gudahooda laga soo bilaabo taariikhda lagu shaqaaleeyay. 75 saacadood ee la dhammeystay waxaa ka mid ah:

1. Hanuunin (tababbarkan) – laba saacadood
2. Tababbarka bedqabka – saddex saacadood
3. Tababbarka aasaasiga ee udub-dhexaadka ah – 38 saacadood
4. Ku-tababbar qaadashada xirfadaha gacanta laga sameeyo (ama tababbarka shaqada gudaheeda laga sameeyo) – 16 saacadood
5. Mowduucyada gaarka ku ah dadka (Koorso takhasusi ah kasta ee 8 saacadood soconaysa sida Waalidda, Dhaawaca Maskaxda ee Qarracan, Cudurka Sonkorowga, Xanuunka Isticmaalka Maandooriyaha ama Xil Wareejinta Kalkaaliyaha Caafimadka) – 16 saacadood

Loo-shaqeeyahaaga wuxuu sidoo kale u baahan doonaa tababbarka kale ee gaarka ku ah goobtaada shaqada.

Imtixaanka Kaaliyaha Daryeelka Guriga

Marka aad tababbarkaaga dhammeysato, waxaad u baahan doontaa in aad ka gudubto imtixaanka Kaaliyaha Daryeelka Guriga. Imtixaankan waxaa uu ka kooban yahay imtixaan aqooneed su'aalo kala doorasho ah leh iyo imtixaan lagu soo bandhigayo xirfadaha. Waa in aad imtixaanka kaga gudubtaa 200 maalmood gudahooda laga soo bilaabo taariikhda lagu shaqaaleeyay ama 260 maalmood haddii aqoonta aad u leedahay luuqadda Ingiriisku ay kooban tahay.

Waxbarasho Sii-wadashada iyo Dib-u-cusboonaysiinta Shahaaddada

Waa in aad dhammeysataa 12 saacadood oo ah tababbarka waxbarasho sii wadashada ee ay DSHS ansaxixay maalintaada dhalashada ee sanad kasta. Haddii

maalintaada dhalashada ka-dib marka aad qaadato shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga ay ka yar tahay sanad buuxa laga bilaabo taariikhda shahaado qaadashadaada, waxbarasho sii wadasho lagaaga ma baahna muddada dib-u-cusboonaysiinta ee ugu horreysa.

Shahaaddada kaaliyaha daryeelka guriga waxay dhacdaa sanad walba maalintaada dhalashada. Haddii maalintaada dhalashada ee xigta ay ku jirto gudaha saddex bilood ee shahaaddo qaadashada hore, taariikhdaada dib-u-cusboonaysiinta koowaad waxay noqon doontaa maalinta dhalashada labaad ka-dib shahaado-qaadashada hore. Lacagta dib-u-cusboonaysiinta ayaa loo baahan yahay si dib u cusboonaysiin loogu sameeyo.

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxbarasho sii wadashada iyo dib-u-cusboonaysiinta, eeg doh.wa.gov/licenses-permits-and-certificates/professions-new-renew-or-update/home-care-aide/frequently-asked-questions.

Si aad hesho fasallada waxbarasho sii wadashada, booqo dshs.wa.gov/altsa/training/continuing-education-ce.

Waa mas'uuliyadaada in aad haysato shahaadooyinkaaga iyo caddeymaha saacadaha waxbarasho sii wadashada.

Haddii aad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shahaaddada Kaaliyaha Daryeelka Guriga, eeg doh.wa.gov/licenses-permits-and-certificates/professions-new-renew-or-update/home-care-aide/frequently-asked-questions.

Ma u Baahan Tahay Caawimaad?

Hagayaasha Cuddada Shaqaalaha ee Daryeelka Muddada-Dheer waxay kugu hagi karaan hannaanka noqoshada Kaaliyaha Daryeelka Guriga oo shahaado-haysta oo mushaar la siiyo. Si aad caawimaad u hesho, farriin u dir Hagaha degaankaaga:

caregivercareerswa.com

caregivercareerswa@dshs.wa.gov

Gebagebo...

Waxaa jira wax badan oo la baranayo marka la bilaabayo shaqo cusub ka daryeele ahaan. Hanuunintan waxaa ay ku siisay guudmarka qaar ka mid ah waxyaabaha ugu muhiimsan ee la oggaanayo iyo halka la tagayo si loo helo macluumaad dheeraad ah toddobaadyada soo socda.

Dhammaanteenna waxaan leenahay baahiyo iyo dookhyo annaga gaar inoo ah. La hadal dadka aad taageerto waxna ka baro. Ogow waxa muhiimka u ah oo qiimee waxa ay kuu sheegayaan. Marka qofka aad shakhsi ahaan u barato, waxaad siin kartaa taageerada ay u baahan yihiin.

Shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ahaan, waxaad isbeddel ku sameysaa nololsha dadka ee maalin kasta. Waxa aad sameyso waxay qiimo badan u leeyihiin dadka aad taageerto. Ku faan waxa aad sameyso!

Way adag tahay in la helo xifad dadka shaqeeya ay dareemaan in lagu qiimeeyo waxa ay qabtaan. Sidoo kale xaaladda shaqaalaha daryeelka muddada-dheer waa sidan iyo si la mid ah.

Maalmaha intooda badan, mahadnaq qalbiga ka soo go'day iyo qaddarinta aad ka hesho macmiilka, qoyskiisa iyo saaxiibadiisa, kormeeraha ama xubin kale oo ka tirsan kooxda daryeelka ayaa kaa caawinaysa in aad xusuusato sababta shaqadan aad loogu qanci karo. Hubso in aad naxariistan tusiso naftaada iyo dadka kale.



Lifaaqa 1aad: Ereyada La Isku Gaabiyay ee Caamka ah

Xirfadda daryeelka muddada-dheer waxaa ay leedahay ereyo badan oo la isku gaabiyay. Tababbarkan ma adeegsado ereyo la isku gaabiyay si uu u noqdo mid fudud in lafahmo. Haseyeeshee, waxaad ku maqli kartaa ama ku arki karaa ereyadan la isku gaabiyay ee caamka ah dooraaga ka shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ahaan.

AFH	Adult family home (Guriga qoyska qaangaarka ah)	Degaan, guri xaafadeed shati u haysta daryeelka labo ilaa sideed qof.
ALF	Assisted living facility (Xarunta xannaaneynta waayeelka iyo naafada)	Xarun degaan ah oo weyn oo shati u haysata daryeelka toddobo qof ama in ka badan.
AL TSA	Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida	Maamul ka tirsan DSHS oo bixiya adeegyada iyo taageerada la siiyo dadka waaweyn iyo dadka naafada ah. dshs.wa.gov/altsa .
APS	Adeegyada Ilaalinta Dadka Waaweyn	Qayb ka tirsan DSHS oo baarta xadgudubka la tuhunsan yahay in loo geystay dad waaweyn oo nugal: dshs.wa.gov/altsa/adult-protective-services-aps .
CM	Case manager (Maamulaha kiiska)	Qofka macmiilka ka caawiya diyaarinta qorshe daryeel, u suurageliya in uu ku noolaado goob uu doortey, korjoogteeya qorshahaasi oo isuduwa kaalmada iyo helidda adeegyada loo baahan yahay.
CRU	Complaint Resolution Unit (Qaybta Xallinta Cabashooyinka)	Qayb ka dhex jirta gudaha DSHS oo qabata telefoonnada waxayna ururisaa macluumaadka ku saabsan xadgudubka iyo dayaca ee ka dhaca guriga qoyska qaangaarka ah, xarunta xannaaneynta waayeelka iyo naafada xarunta adeegyada la wanaajiyey, ama guriga kalkaalinta.
DDA	Developmental Disabilities Administration (Maamulka Naafonimada Koritaanka)	Maamul ka dhex jira DSHS oo caawiya shakhsiyaadka qaba naafonimada koritaanka iyo qoysaskooda: dshs.wa.gov/dda .
DOH	Department of Health (Waaxda Caafimaadka)	Waaxda gobolka ee nidaamisa jaangooyada xirfadeed iyo shati-xbinta oo ah qayb ka mid ah hawlgalkeeda ilaalinta iyo sii wanaajinta caafimaadka dhammaan dadka ku nool gobolka Washington: doh.wa.gov .
DSHS	Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada	Hay'ad dowladda gobolka ka tirsan oo bixisa barnaamijyo iyo adeegyo lagu caawinayo carruurta, dadka waaweyn, iyo qoysaska gobolka Washington: dshs.wa.gov .
ESF	Enhanced services facility (Xarunta adeegyada la wanaajiyey)	Xarumo degaan ah oo loogu talagalay ilaa 16 qof lehna hawladeenno gaar ah iyo adeegyo degdeg ah oo diirrada saaraya wax-ka-qabashada hab-dhaqanka.

HCA	Home Care Agency (Hay'adda Daryeelka Guriga)	Adeeg-bixiye shaqaaleysa shaqaalaha daryeelka muddada-dheer si ay u booqdaan macaamiisha uguna siiyaan adeegyo daryeel gudaha guryahooda.
HCA	Home Care Aide (Kaaliyaha Daryeelka Guriga)	Shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ee soo dhammeystay tababbarkooda 75 saacadood ee dhammeystiran, kana gudbay imtixaannada xirfadaha iyo aqoonta, oo ka qaatay isla-markaana gacanta ku hayo shahaaddada kaaliyaha daryeelka guriga Waaxda Caafimaadka.
IP	Bixiyaha Shakhsiga ah (Individual Provider)	Shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ee la aqoonsan yahay kaas oo qandaraas kula jira loo-shaqeeyaha uu macmiilku jiheeyo (consumerdirectwa.com) si uu u bixiyo daryeelbixinta guriga gudahiisa ah ee la siiyo macaamiisa xaqa u leh adeegyada daryeelka guriga gudahiisa ee Medicaid.
LTCW	Long-term care worker (Shaqaalaha daryeelka muddada-dheer)	Qof bixiya adeegyada daryeelka shaqsiyeed, lacag lagu qaato oo loogu talagalay dadka waaweyn ama dadka naafada ah. LTCWs waxaa ka mid ah Kaaliyayaasha Daryeelka Guriga ee Aqoonsiga haysta ama La Xaqiijiyey (HCA), Kaaliyayaasha Kalkaalinta – La Xaqiijiyey (NAC), iyo Kaaliyayaal Kalkaalin – Diiwaangashan (NAR).
RCW	Revised Code of Washington (Xeerka Washington ee Dib-loo-eegay)	Sharciyada joogtada ah ee gobolka Washington: apps.leg.wa.gov/rcw .
WAC	Washington Administrative Code (Xeerka Maamulka ee Washington)	Xeernidaamyada (xeerarka) hay'adaha fulinta ee gobolka: apps.leg.wa.gov/wac .

Lifaaqa 2aad: Liisto-hubineedda Hanuuninta Shaqaalaha Daryeelka Muddada-Dheer

Liisto-hubineeddan waa qalab aad adeegsan karto inta tababbarka lagu guda jiro. Ma ahan dokumentiga rasmiga ah ee dhammeystirka ama foomka loogu baahan yahay Tababbarka Hanuuninta Shaqaalaha Daryeelka Muddada-dheer. Shahaaddada dhammeysashada waa dokumentiga rasmiga ah ee dhammeysashada.

[WAC 388-112A-0210](#) iyo [WAC 388-71-0846](#) ayaa u baahan mowduucyadan soo socda ee loogu talagalay hanuuninta shaqaalaha daryeelka muddada-dheer. Eeg [WAC 388-112A-0210](#) si aad u oggaato shuruudaha hanuuninta xarunta ee dheeraadka ah.

Mowduuca	Bogagga
Goobta daryeelka iyo sifooyinka iyo baahiyada gaarka ah ee dadka loo adeegay.	11-12
Mas'uuliyadaha shaqada aasaasiga ah iyo filashooyinka waxqabadka.	13-14
Qorshaha daryeelka ama heshiiska adeegga ee laga gorgortamey, oo uu ku jiro waxa uu yahay iyo sida loo adeegsado.	15-16
Kooxda daryeelka.	6
Hanaanka, siyaasadaha, iyo habraacyada indha-indhayn, diiwaangelinta iyo ka-soo-warbixinta.	27-29
Xuquuqaha degganaha ee uu sharcigu dhowro, oo ay ku jiraan xaqa loo leeyahay sir ilaalinta iyo xaqa ka-qaybgalka go'aamada daryeelka ama in la diido daryeelka iyo sida shaqaalaha daryeelka muddada-dheer ayaa ilaalinaya oo dhiirrigelinaya xuquuqahan.	7-11
Sharciga ka-warbixiyaha khasabka ah iyo mas'uuliyadaha shaqaalaha ee loo baahan yahay ee waafaqsan cutubka 74.34 RCW.	30-34
Farsamooyinka iyo hababka war-iskaarsiinta ee la adeegsan karo inta lala shaqeynayo deggane ama mas'uul iyo xubnaha kale ee kooxda daryeelka.	20-26

Taariikhda Tababbarka Hanuuninta La Dhammeeyay	
Saxiixa Shaqaalaha Daryeelka Muddada-Dheer	
Saxiixa Macallinka	

Mahadnaq

Manhajkan ayaa la diyaariyey iyadoo la adeegsanayo jawaab-celin iyo aragti laga soo ururiyey khuburro ku xeel-dheer mowduuca, daneeyeyaal, macallimiin, iyo Bah-wadaagta Qabaa'illada, u-qareemayaasha macaamiisha, iyo ka-qaybgalayaasha adeegga ee guud ahaan gobolka.

Horumarinta Manhajka

Samuel Cooke, Takhasusle Ku-xeeldheer Tababarka iyo Manhajka Adeegyada Guriga iyo Bulshada Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Gaboobidda ee DSHS

Kuwa Wax-ku-biirriyay

Jessica Baker, Horumariye Manhaj Adeegyada Guriga iyo Bulshada Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Sherise Baltazar, La-taliyaha Guriga Qoyska Qaangaarka ah Proactive Solutions LLC

Ashley Beckley, Maamulaha Barnaamijka CRSB Learning Solutions Maamulka Naafonimada Koritaanka ee DSHS

Julie Boghokian, Maamulaha Barnaamijka Tababbarka Catholic Community Services of Western Washington

Melissa Brunton, Maamulaha Barnaamijka Tababbarka ee Regulatory QA Adeegyada Daryeelka Degaanka Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Adora Brouillard, Maamulaha Qaybta Tababbarada Adeegyada Guriga iyo Bulshada Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Frank Buchanan, Xubin Ka Tirsan Kooxda Waayo-aragnimada Adeegga

Mary M Campbell, Maamulaha Barnaamijka Kheyraadka iyo La-Talinta Dadka Maqalka Ku Adag Yahay Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Brenda Carlstrom, Xubin Ka Tirsan Kooxda Waayo-aragnimada Adeegga

Stephany Castilleja, Maamulaha Barnaamijka Regulatory QA – Bulshada Residential Care Services Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Earnest Covington III, Agaasime Xafiiska Dhegoolayaasha iyo Kuwa Maqalka Ku Adag Yahay Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Kenny Davis, Maamulaha Qaybta Tababbarka Degaanka Maamulka Naafonimada Koritaanka ee DSHS

Tina Edson, Agaasimaha Barnaamijka Hordhaca Daryeelka Bukaanka - Dugsiga Sare ee Everett

Lia Edwards, Manhajka & Wax-barista Tababbarka Kaaliyaha Daryeelka Guriga Kuliyadda Bulshada ee Spokane Falls

Arielle Finney, Maamulaha Barnaamijka Siyaasadda Xarunta Xannaaneynta Waayeelka iyo Naafada Residential Care Services Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Jackie Fry, Maamulaha Barnaamijka ee Qaybta Tababbarada Adeegyada Guriga iyo Bulshada Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Robin Gibson, Agaasimaha Adeegga Long Term Care Catholic Community Services of Western Washington

Stacy Graff, Maamulaha Horumarinta Cudadda Shaqaalaha Adeegyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Barbara Hannemann, Madaxa Xafiiska, Barnaamijyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Sondra Haas, Maamulaha Barnaamijka Siyaasadda ee LTC Residential Care Services
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Tereasa Hernandez
Rosewood Cottage at Lake Chelan

Huy Ho, Maamulaha Barnaamijka Tababarka Regulatory QA Adeegyada Daryeelka Degaanka
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Colleen Jensen, Maamulaha Barnaamijka Siyaasadda Guryaha Qoyska Qaangaarka ah
Residential Care Services
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Saira Khan, Maamulaha Barnaamijka ee Qaybta Tababbarada
Adeegyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Christine Kubiak, Maamulaha Barnaamijka Kalkaalisada Caafimaad ee Regulatory QA
Residential Care Services
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Allison Lally, Takhasuslaha Hawlgallada
Brookdale Senior Living

Gregory LaVielle, Maamulaha Barnaamijka Tababarka Adeegyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Larissa Lewis, La-taliyaha Kalkaalisada Caafimaadka Shaqada, Cudurrada Faafa
Waaxda Shaqaalaha & Warshadaha ee Gobolka Washington

Elena Madrid, Madaxweyne Ku-xigeenka Fulinta ee Waxbarashada iyo Arrimaha Nidaaminta
Ururka Daryeelka Caafimaadka ee Washington

Suzanne Mannella, Maamulaha Barnaamijka Xafiiska Dhegoolayaasha iyo Kuwa Maqalka Ku Adag Yahay
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Stephanie Marko, Takhasuslaha Barnaamijka Ku-negaanshaha iyo Shaqaalaha Cududda Horumarinta Adeegyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Kristine Mazulo, Takhasuslaha Kala-guurka iyo Tababbarka ee CRSB
Maamulka Naafnimada Koritaanka ee DSHS

Marian McGunagle, Isuduwaha Qaadashada/Tababaraha Daryeelka
Adeegyada Caawimaadda Visiting Angels Living

Molly McIsaac, Maamulaha Barnaamijka Tababarka Adeegyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Vicki McNealley, Agaasimaha Xarunta Xannaaneynta Waayeelka iyo Naafada
Ururka Daryeelka Caafimaadka ee Washington

Rebecca Mead, La-taliyaha Siyaasadda ee Sare Adeegaha Ilaalinta Qofka waaweyn
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Cheryl Miller, Agaasimaha Adeegyada Qoyska iyo Carruurta
Qabiilka Port Gamble S'Klallam

David Minor, Isuduwaha Sanduuqa iyo Golaha TBI Adeegyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Christine Morris, Madaxa Xafiiska Qaybta Horumarinta Shaqaalaha, Wadahadalka iyo Tababarka Adeegyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida ee DSHS

Marlo Moss, Kalkaaliyaha Caafimaad ee Ka Hortagga
Caabuqa
Adeegyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida
ee DSHS

Faduma Mursal, Agaasimaha Tababbarka
Washington Care Academy

Angela Nottage, Maamulaha Qaybta NPI
Adeegyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida
ee DSHS

Julie Peters, Maamulaha Barnaamijka Tababarka Tayo
Xaqiijinta,
Adeegyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida
ee DSHS

Isaac Peterson, Xubinka Kooxda Waayo-aragnimada Adeegga

Kerry Reetz, Maamulaha Barnaamijka Tababarka
Regulatory QA
Residential Care Services
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida
ee DSHS

Angela Regensburg, Maamulaha Barnaamijka, Qaybta
Tababarka Manhajka Gaarka ah iyo Tayo Xaqiijinta
Adeegyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida
ee DSHS

Lisa J. Robbe, Qareenka the DD Ombuds
U-doodaha Xuquuqda Naafonimada Koritaanka
ee Gobolka, Xafiiska Spokane

AJ Roberts, Maamulaha Regulatory QA – CCRSS/ICF
Residential Care Services
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida
ee DSHS

Manny Santiago, Agaasimaha Fulinta,
Guddiga LGBTQ ee Gobolka Washington

Betty Schwieterman, U-doodaha Xuquuqda
Naafonimada Koritaanka ee Gobolka

James (JD) Selby, Maamulaha Barnaamijka Taageerada
Ka-dhaafidda ee Degaanka
Adeegyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida
ee DSHS

Jim Sherman, Maamulaha Barnaamijka ee Regulatory QA
Residential Care Services
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida
ee DSHS

Crissy Smith, Kobciyaha Waxbarashada Elektarooniga
ah (eLearning)
Adeegyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida
ee DSHS

Barbara Thomas, Maamulaha Barnaamijka ee Regulatory
QA – Bulshada
Residential Care Services
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayeelida
ee DSHS

Derek Trubia, Maamulaha Isuduwidda ADA iyo Gaarista
DSHS

Robin VanHying, Aasaasaha, Milkiilaha, Agaasimaha
Tababarka
Shirkadda Tababarka Daryeelka Caafimaadka
ee Cornerstone, LLC

Meagan Williams, Takhasuslaha Maaliyadda/
Qandaraasyada
Daryeelka Muddada-Dheer iyo Waayeelka
ee Bartamaha Washington

Zya Williams, Xubinka Kooxda Waayo-aragnimada
Adeegga

Macallinka Tijaabada ah

Dave Foltz, Macallinka Kaaliyaha Daryeelka Guriga
La-taliyayaasha Rythm Senior Living

Tifaftiriddii iyo Nakhshadeynta Muuqaal Shaxeedka ee Kama-dambeysta ah

Cheri Huber, Maalaha War-isgaarsiinta Muuqaalka
Xafiiska Hal-abuurka, Istiraatiijiyadda, iyo
War-isgaarsiinnada Muuqaalka
Xafiiska Xoghaynta
DSHS

Jessica Nelson, Maamulaha Xiriirka Warbaahinta
Xafiiska War-isgaarsiinta iyo Arrimaha Dowladda
Xafiiska Xoghaynta
DSHS

Helidda Dokumentiga

Crissy Smith, Kobciyaha Waxbarashada
Elektarooniga ah (eLearning)
Adeegyada Guriga iyo Bulshada
Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Waayelida
ee DSHS

Sawirrada Waxaa Iska leh

Dhammaan sawirrada waxaa loo adeegsadaa si waafaqsan shatiyada caadiga ah ama qandaraasyada Microsoft 365, Adobe Stock, Getty Images ama DSHS. Sawirrada daryeelaha iyo macaamiisha gobolka Washington ayaa oggolaanshahooda lagu adeegsadaa. Sawirrada tababbarkan dib looguma adeegsan karo ujeeddo kale.

Nagala Soo Xiriir

Haddii aad qabto su'aalo, walaacyo ama soo-jeedimo ku saabsan buuggan, fadlan nagala soo xiriir TCDUTrngDev4@dshs.wa.gov.

Hagayaasha Shaqaalaha Cududda Daryeelka Muddada-Dheer wuxuu ku siin karaa macluumaad iyo hagd loo marayo hannaanka lagu noqonaya HCA la aqoonsan yahay oo mushaar la siiyo. Si aad caawimaad u hesho, farriin u dir Hagaha degaankaaga adiga oo u marsiinayo mareegtada: caregivercareerswa.com or email caregivercareerswa@dshs.wa.gov.

